# CILMIGA BULSHADA

## TILMAAME BARE

### Fasalka 7aad

ISBN 978-99944-2-119-0

JAMHURIYADA DIMOQRAADIGA FADARAALKA ITOOBIYA

WASAARADDA WAXBARASHADA

Birr 47.60

CILMIGA BULSHADA TILMAAME BARE Fasalka 7aad

MOE

# CILMIGA BULSHADA

## TILMAAME BARE

### Fasalka 7aad



JAMHURIYADA DIMOQRAADIGA FADARAALKA ITOOBIYA

WASAARADDA WAXBARASHADA

# CILMIGA BULSHADA

## TILMAAME BARE

### FASALKA 7^AAD

Qorayaasha Tafatirayaasha:

Cabdlcasiis Maxamed Aadan (Baaruud)
Cali Muxumed Bakaal

Qiimeeyayaasha:

Maxamed Cabdi Roble
Maxamed Bade Maxamuud
Deeq Axmed Badal

JAMHUURIYADA DIMUQRAADIGA FEDARAALKA
ITOOBIYA, WASAARADA WAXBARASHADA

Wasaarada waxbarashada ee jamhuuriyada Dimoqraadiga Fedaraalka Itoobiya mashruuca hoos yimaad ee uqaybsan kor u qaadista iyo horumarinta tayada waxbarashada Guud oo taageero ka helay hayada IDA Credit No. 4535 ET oo ah the Fast Track Initiative catalytic fund iyo dawladaha Finland, Italy, Netherland iyo United Kingdom.

© 2011 wasaarad waxbarashada ee jamhuuriyada Dimoqraadiga Federaalka Itoobiya. Xuquuqda buuggani way u dhawsan tahay wasarada waxbarade ee JDFI. Buugga ama qayb ka mid ah buugga lama guurin karo lama daabici karo lamana baahin karo, iyada oo la adeegsanayo qalabyada eletirooniksa iyadoo ogolaansho qoraal ah aan laga haysanin wasaaradda waxbarashada ama liisan ka saamaxaya xeerka qodobka No. 4/0/2004 ee xuquuqda daabaca oo ah maqaal ay jumhuriyada Dimoqraaidiga Fedaraalka Itoobiya.

Wasaaradda waxbarashadu waxay u mahad naqaysaa shakhsiyaadka iyo kooxaha si toos ah iyo si dadban uga qayb qaatay daabicista iyo soo saaridda buuggan.

Kuwa haysta ogolaashaha qoraalka laakiin lagu eedeeyo inay gaf ka galeen xuquuqda buugga. Waa in ay la xidhiidhaan xafiis waynaha wasaaradda Waxbarashada ee ku taala Arata kiilo, Adiss Ababa, Itoobiya.

***Waxaa Soo saray oo daabacday***

STAR EDUCATIONAL BOOKS DISTRIBUTORS Pvt. Ltd.

24/4800, Bharat Ram Road, Daryaganj,

New Delhi – 110002, INDIA

**iyo**

ASTER NEGA PUBLISHING ENTERPRISE

P.O. Box 21073

ADDIS ABABA, ETHIOPIA

*Under GEQIP Contract No. ET-MoE/GEQIP/IDA/ICB/G-07/09-B.*

ISBN 978-99944-2-119-0

# TUSMADA BUUGA

## CUTUBKA 1AAD


**KUNOOLAANSHAHA AFRIKA** 1

**1.1** BAAXADDA, QAABKA IYO MEESHAY DHACDO QAARADDA AFRIKA ....2

**1.2** LOOLASHA IYO DHIGAHA ....5

**1.3** QOYSASKA AMA BAHAHA LUUQADAHA WAA WEYN EE AFRIKA .... 10

**1.4** ILBAXNIMADII HORE EE AFRIKA (MASAARIDA IYO KAARTEEJ) .... 12

**1.5** QARAMADII GUUMEYSIGA KA HOR JIRAY EE AFRIKA ---- 15

**1.6** GANACSIGII MASAAFADA DHEERAA OO AHAA QODOB ISKU XIDHA DADKA ITOOBIYA .... 17

**1.7** DADWEYNAHA QAARADDA AFRIKA .... 20


## CUTUBKA 2AAD


**QAAB DHISMEEDKA DHULKA** 27

**2.1** LAKABYADA DHULKA .... 28

**2.2** SAMEYSKA IYO NOOCYADA DHADHAABAHA ..... 30

**2.3** ADEEGSIGA IYO XOG KA HELIDDA KHARIIRADAHA .... 358

# CUTUBKA 3^AAD


## GEYIGA IYO HAWLIISA 39

**3.1** DHIRTA DABIICIGA AH IYO XAYAWAANADA DUURJOOTA AH ........ 40

**3.2** BIYAHA, CARRADA IYO HAWADA ........ 44

**3.3** TALLAABOOYINKA DHAWRISTA KHAYRAADKA DABIICIGA AH ........ 49


# CUTUBKA 4^AAD


## ARRIMAHA DADWAYNAHA 55

**4.1** ARRIMAHA LA XIDHIIDHA DADWEYNAHA ........ 56

**4.2** ARRIMAHA XUQUUQDA IYO BADBAADADA ........ 62

**4.3** BARNAAMIJKA ISKAASHIGA ........ 65

Muqaraka fasalka 7^aad ee Cilmiga Bulshada ........ 70

# CUTUBKA 1 KUNOOLAANSHAHA AFRIKA

**Xiisadaha guud ee cutubkan waa 23 xiisadood.**

## HORDHACA CUTUBKA

Waxaad xasuusantahay in ardaydu ay ku soo barteen Fasalkii hore Bariga Afrika halka uu dhaco iyo dagaamada iyo dadka Bariga Afrika.

Fasalkan ardaydu waxay baran doonaan Juquraafiga muuqaaleed (debiiciga ama waxyaabaha dabiiciga ah ka hadla) iyo midka aadamiga ah, qaab-dhismeedka dhulka, geyiga iyo hawlihiisa.

Gaar ahaan cutubkan ardaydu waxay ku baran doonaan baaxadda qaabka iyo meesha ay dhacdo qaaradda Afrika.

## Ujeedooyinka Cutubka:

***Marka uu dhamaado cutubkan, ardaydu waxay awoodi doonaan inay:***

- *Aqoonsadaan qaabka, baaxadda iyo meesha saxda ah ee ay dhacdo (kutaallo) qaaradda Afrika.*
- *Sharraxaan xariiqaha loolalka ama barbaraha iyo dhigaha.*
- *Fahamaan waxtarada loolalka iyo dhigaha.*
- *Sharxaan Bah-luuqadeedyada ugu muhiimsan ee Afrika.*
- *Aqoonsadaan ilbaxnimadii hore iyo qaramadii gumeysiga ka hor ee Afrika.*
- *Ka doodaan qodobada saameeya baahidda, deegaamaynta iyo nolosha Afrika.*

**Tusmooyinka muhiimka ah ee cutubka 1aad**

1.1 Baaxadda qaabka iyo meeshay dhacdo Afrika 2 xiisa dood

1.2 Loolka iyo dhigta. 3 xiisa dood

1.3 Bah luuqeedyada iyo baahsanidooda 2 xiisadood.

1.4 Ilbaxnimadii hore ee Afrika. Waa 2xiiso
1.5 Magaalo qaramooyinkii guumeysiga hortiisa ahaa ee Afrika 3 xiisadood
1.6 Ganacsiga masaafada dheer waa qodob isku xidha dadka Itoobia 3 xiisadood
1.7 Dadweynaha Afrika.

# 1.1 Baaxadda, Qaabka Iyo Meeshay Dhacdo Afrika

## 1. Ujeedada gaarka ah:

Marka u dhamaado casharkani, ardaydu waxay awoodi doonaan in ay.

- Sharxaan booska Afrika ay dhacdo marka loo eego wadamada dariska la'ah iyo badaha iyo badweynada.
- Sharxaan baaxadda iyo qaabka Afrika

## 2. Tusmada

Barta ay dhacdo Afrika baaxadda iyo qaabka qaaradda Afrika

## 3. Araar

Su'aal kasta oo ay juquraafiyahanadu doonayaan in ay ka jawaaban oo ku saabsan dhulka iyo dadka waxay ku lug lahaataa ama ay kolka hore ogaadaan goobta (meesha). Si ay dadku u aqoonsadaan goobaha ama meel, waxay isticmaalaan magacya guud sida dhul sare, waa dhulka uu joogiisu ka badan yahay 1500 mitir kor ka ah heerka badda. Goob kasta waxay ku taalaa boos ama meel dhulka korkiisa ah. Juquraafiyahanadu si ay u tilmaamaan meeli halka ay dhacdo ayaa waxay adeegsadaan habab kala duwan. Hababkaas kuwa sida guud loo wada adeegsado waa goobi ama meeli halka ay dhacdo daris ahaan iyo xariiq ahaan.

## 4. Hababka baris Barasho

## 4.1 Adeegsiga kaabayaasha barista

- Khariirada siyaasadeed ee Afrika
- Khariirada muuqaaleed ee Afrika
- Aqal-aduunka (Galoobka)
- Atlaaska

## 4.2 Adeegsiga hababka barista (wax-baris)

- Sharaxaad
- Ka wada hadlid (ka wada doodid)
- Qeexid ama caddayn

## 4.3 Cashir diyaarinta horteed

- Diyaarso khariirad darbiyeeda (khariirada la sudho darbiga) Afrika ama aduunka.

## 4.4 Soo jeedinta Cashirka

**B. Hordhaca cashirka.**

Waxaa dhici karta in uu baruhu isticmaalo hab-kiis ah oo uu cashirkan ku soo bandhigayo. Hasa yeeshe, hab ugu fudud ee loo soo jeediyo hordhaca cashir waa iyadoo lagu bilaabo su'aalo la xidhiidha cashirka. Su'aalaha laf ahaantooda waxay diiriyaan ardayda oo ay waliba xiskooda soo jeediyaan.

Ardaydu ha indha in dheeyaan khariirada darbiga aad u sudhay ee Afrika iyo Aduunka.

Baraw u sheeg oo ku wargali ardayda in ay xooga-saaraan ama ahmiyada siiyaan booska, baaxadda iyo qaabka qaaradaha muhiimka ah.

Baraw waxaad siin kartaa hawlgal fasal oo sidan soo socota oo kale ah.

In ay sharxaan halka ay dhacaan daris ahaan wadamada Afrika. Waxaad u baahan khariirada Afrika sida mida buuga ardayga ku taala oo kale.

Si ay u bartaan waddan halka uu dhaco xariiq ahaan.

- Ha helaan goob ama meel iyagoo-isticmaalaya Atlaska si aad u tijaabisid aqoontooda
- Koox-koox ha kaga shaqeeyaan ama ha u wada shaqeeyaan hana wada tashadaan.

Baraw waxaa kale oo aad ardayda waydiisaa su'aalaha soo socda.

- Halkay dhacdaa (ku taalaa) Afrika?
- Intee ayay waynideedu (baaxadda) Afrika le'egtahay marka loo eego qaaradaha kale?
- Sidee ayay idin la tahay qaabka afrika?
- Qaabkee ayay leedahay Afrika?

**T. Nuxurka Cashirka**

Baraw adigoo ka duulaya macluumaadka muuqaaleed ee khariirada aduunka iyo ta Afrika ee jaantuska 1.1 iyo 1.2 sharax ama caddee meeshay dhacdo Afrika daris ahaan iyo xariiq ahaan.

- Qeex baaxadda dhulka iyo qaabka Afrika adigoo barbar dhigaya qaaradaha kale
- Jawaabaha ardada kadib, baraw isku day in aad sharaxaad kooban ka bixisid booska, baaxadda iyo qaabka Afrika.
- Sharrax sida ay Afrika u tahay mid uu isu-dheeli tiran yahay booskeeda agagaar ka dhulbadhaha
- Cadee wareegsanideeda adigoo cabbiraya fogaanta digrii ee Bari–Galbeed iyo mida koonfur ilaa waqooyi iyo waliba kiiloomitirkooda.
- Isbarbardhig qaybta ama baaxadda dhuleed ee nus dhuleedka waqooyi iyo baaxadda dhuleed ee nus-dhuleedka koonfureed ee Afrika.

## 4.5 Qiimaynta iyo dabagalka la socodka

Baraw ardeyda sii hawlgal fasal oo sidan soosocota oo kale ah

1. Sheega qaabka wadamadan soo socda indinkoo ka tixraacaya ama ka eeganaya jaantuska 1.2 ee buuga ardayga ku yaala.

   b. Itoobiya x. Gaambiya

   t. Lesooto kh. Liibiya

   j. Sa'iir

2. Baruhu waa in uu darbiga fasalka sudho khariirad siyaasadeeda Afrika taasoo laga soo sawiray buuga ardayga. Kadib waydii ardayda:-

In ay caddeeyaan daris ahaan halka ay dhacdo:

| | | | |
|---|---|---|---|
| b. | Itoobiya | x. | Masar |
| t. | Senegaal | kh. | Jaadh |
| j. | Jamhuuriyada koonfur Afrika. | | |

3. Baraw ardaydu ha ku daraan magacyada wadamada, caasimadaha iyo wabiyada waawayn khariiradooda.

- Hawlgalka ardayda fahanka badan (dhakhsa wax u fahma).
- Raadi fogaanta digrii ee u dhaxaysa cidhifyada koonfurta iyo waqooyi iyo mida u dhaxaysa Bari iyo galbeed ee Itoobiya?
- U badal digriiga aad heshay kiilomitir ama mayl.

b. Fogaantee ayaa labadooda dherar badan? Ma mida Bari–Galbeed mise mida koonfur-Waqaayi?

t. Qiyaas qaabka Itoobiya adiqoo eegaya faraqa u dhexeeya fogaant Bari-galbaad iyo mida koonfu–Waqooyi.

# 1.2 Loolasha iyo dhigaha

**Xiisaduhu waa 3**

## Ujeedada gaarka ah

***Marka ay dhamaato qaybtan cutubka ardaydu waxay awoodi doonaan in ay:***

- *Sharxaan erayada loolka iyo dhigta ee la xidhiidha barbaro (xariiqaha barbaro) iyo xariiqaha dhigaha ka (madlaca).*
- *Sharxaan ujeedada ama hadafka loolalka (barbaro) iyo dhigaha.*
- *Sharaxaan xidhiidhka ka dhexeeya dhigaha iyo waqtiga.*
- *Xisaabiyaan faraqa, waqti ee u dhexeeya goobaha.*
- *Fahmaan wakhti gobaleedka caalamiga ah.*
- *Ka wada hadlaan ama sharxaan sida ay maalmuhu isu badalaan markay gudbaan xariiqa kala badha maalinta ee caalamiga ah.*

## 2. Tusmada ama dulucda cashirka uu ka kooban yahay:

- Xariiqaha loolasha iyo dhigaha iyo Dhiga-dhexada.
- Dhulbadhaha, kulaalaha kansarka iyo kulaalaha kaabrikoonka.
- Waqti socodka.

## 3. Araar

Ardaydu horay ayay u soo barteen halka uu dhaco Bariga Afrika. Meeli halkay dhacdo waxaa lagu tilmaamaa ama caddeeya loolka iyo dhigta. Marka, waxaan filaynaa ardaydu in ay waxoogaa fikir ah amaba xog ka haysato loolaka iyo dhigaha. Cashirkan ardaydu waxay ku baran doonaan barbarada iyo dhigaha. Xariiqahan waa kuwo muhiim ah marka la tilmaamayo meeli ama goobi halka ay kaga taalo ama ka dhacdo dhulka dushiisa. Dhigaha waxaa loo isticmaala ama uu waxtarkoodu yahay in ay habeeyaan wakhti gobaleedyada caalamiga ah iyo xariiqyada kala badha maalinta ee caalamiga ah.

Loolalkuna waxaynu u isticmaalaa in ay tilmaamo galoobka heerkulka (cimilo) caalamiga ama aduunka, xilliyada kala badnaanta maalinta iyo habeenka ayaa ka mid ah waxtarada ay inoo leeyihiin loolalka.

Goob kasta waxay leedahay bar ama meel ugaar ah oo ay ka dhacdo (kaga taalo) dhulka dushiisa. Si ay u tilmaamaan juquraafiyahanadu ayaa waxay isticmaalaan xariiqo mala awaal ah oo huwan dhulka. Xariiqahan ku yaala Galoobka iyo khariiradaha ayaa kuwa isku-xidha bari iyo galbeed loo yaqaanaa xariiqaha loolalka. Waxay qaataan cabbirka digriiga sida ku cad jaantuska 1.6 ee buuga ardayga.

Kulaalayaashu: waa labada barbarada ah ee fogaanta lool ee isla’e g ee ah 23 ½ W iyo 23 ½ K u jira dhulbadhaha. Labadan lool waa kuwa ugu cidhifeeya Waqooyiga iyo koonfurta ee ay qoraxdu sanadkii ugu yaraan halka maray sida tooska ah isku dul-taagto.

Kulaalaha waqooyi iyo koonfureed ilayska cad-ceeda waxuu si toos ah ugu dhacaa hal maalin sanadkiiba xilliga xagaaga (Juun 21 keeda oo uu toos ugu dhaco ilayska cad-ceedu kulaalaha waqooyi iyo Diseember 21 keeda oo ay qoraxdu kortaagantahay amaba ilays keedu si toos ah ugu dhacayo kulaalaha koonfureed).

# 4. Hababka Baris Barasho

## 4.1 Adeegsiga kaabayaasha barista

Khariirad siyaasadeeda caalamka.

## 4.2 Adeegsiga hababka wax-baris

- Sharaxaad
- Qeexitaan
- Laylisyo

## 4.3 Diyaarinta Cashirka Ka hor

- Ha kuu diyaarsanaadaan khariiradaha caalamka iyo
- Galoobka

## 4.4 Soo bandhigida cashirka

**B. Hordhaca Cashirka**

Baraw ku bilow cashirka su’aalahan soo socda ee fasalka Lixaad duruustiisii ah.

- Qeexa erayada lool iyo dhig?
- Sharax faraqa kala duwanaansho ee u dhexeeya loolka iyo dhigta
- Maxay tahay dhig dhexadu?

**T. Nuxurka Cashirka**

Tilmaan kulaalaha waqooyinga, koonfureed, iyo dhulbadhaha Galoobka dushiisa iyo khariirada dusheedaba, oo ka bixi sharaxaad yar oo kooban xariiq ahaan.

Sharaxaad ka bixii xilliyada jiilaalka iyo xagaaga oo ardaydu hala xidhiidhiyaan dhaqaaqa ama socdaalka qoraxda ee ay waqooyi ka kacdo dhanka koonfurtana u kacdo kadibna waqooyi u noqoto (waqooyi–koonfur iyo koonfur–waqooyi).

Barow! U-qaado khariirada Itoobiya fasalka oo ardaydu ha isku dayaan in ay cabbiraan fogaanta digrii ee u dhexaysa laba meelood (goobood), kadibna ha u badalaan digriigaas kiiloomitir ($1^0$ = 111km). Ha dhawrtaan tusaalayaasha ku yaala buuga ardayga.

Baraw ardaydu ha kala soocaan loolalka iyo dhigaha.

Xariiqda Dhig-dhexadu waa dhig eber ($0^0$) digrii ah oo isku xidha waqooyi iyo koonfur siina gudba dhulbadhaha, waxaa heshiis caalami ah oo dhacay 1884 lagu go'aamiyey in uu noqdo bar bilowga dhigaha.

Baraw u sharax ardayda ujeedada ama hadafka loogu qaybiyay dhulka loolalka iyo dhigaha.

Halka wareeg ee uu dhulku ku wareego udub dhexaadkiisa waxay ku qaadataa 24 saacadood. Midan ayaana keentay.

**b. Maalinta iyo habeenka.**

**t**. faraqa waqti ee halka saac ah ee u dhaxeeya labada dhigood isu jira 15 ka digriiba ($15^0$)

Marka uu dhulka wareegiisa uu ka bilaabo galbeed ee uu u wareego dhanka bari, qayb kamid ah dhulka ayaa helaysa ama u jeedsanaysa qoraxda in waqti ah.

Marka uu dhulku $15^0$ u wareego xagga bari waqti deegaanka waxaa ku darman 1 saac. Isticmaal sawirka ku yaala bogga 22 aad. Kan ayaa muujinaya waqti gobolleedyada caalamiga ah.

Baraw soo qaado Atlas ka Itoobiya oo tusaalayaal ka isticmaal.

Dhamaan Dhigaha Bariga ka ah xariiqda dhig-dhexada oo waxay qoraxda u soo baxdaa Dhigaha kale ka hor, marka waqti deegaankoodu waa u ka horeeyaa Giriinwijka (GMT).

Dhigaha Galbeedka ka xiga xariiqda dhig-dhexada (GMT) waxay qoraxdu u soo baxdaa Dhigtan kadib, marka waqti deegaankoodu waa uu ka dambeeyaa waqtiga Dig-dhexada oo loo soo gaabiyo (GMT).

Baraw diyaarso muuqaal ama sawir muujina waqtiga la isla yaqaano iyo waqtiga deegamada iyo GMT.

Dhigaha waxay inaga caawiyaan in aan ogaano ama xisaabino waqti deegaanka.

Xariiqa caalamiga ah ee kala badha labo maalmood (IDL) waa dhigta $180^0$ Bari iyo $180^0$ Galbeed. Qofkii u socdaala dhanka bari ee Dhig-dhexada waqti ayaa u

kordhaya ama badanaya ilaa iyo inta uu ka gaadhayo $180^0$ Bari dhigaha ah oo uu ka horaynayo Dhig-dhexada 12 saacdood Hadana hadii uu qof u socdaalo dhanka galbeed ilaa iyo dhigta $180^0$ Galbeed, wuxuu waqtigiisu ka dambaynayaa GMT–iiga ama Dhig-dhexada 12 saacadood. Hadaba, xariiqan dhigta $180^0$ ayaa ah xariiqa caalimiga ah ee kala badha ama kala qaybiya labo maalmood. Hadii uu qof gudbo $180^0$ G waxuu dib dhici hal maalin laakiin hadii uu ka yimaado dhanka galbeed oo uu Gudbo $180^0$ B waxuu hordhici hal maalin.

Marka maalintu waa qasab in ay labada dhinacba isbadasho.

Xariiqan Dhigta ah ee $180^0$ waxuu maraa badwaynta baasifiga inta badan dhererkiisu.

## 4.5 Qiimaynta iyo dabagalka la socodka

Buuga ardaygu wuxuu leeyahay laylisyo badan oo lagu hubinayo ujeedada laga lahaa barista cashirka in la gaadhay iyo inkale. Su'aalaha qaarkood waxaa si cadd loogu talagalay ama loo diyaariyay ardayda fahankoodu sareeyo.

Baraw ardayda (si koox-koox ah ama shakhsiyaad ah) ku dhiirigali in ay ka shaqeeyaan laylisyada ku yaala buuga ardayga. Baraw waxaa kale oo aad u dirtaa ama siisaa laylisyo sida soo socota oo kale ah:-

1. Qora dabeecadaha ama sifooyinka xariiqaha barbarlool ah iyo dhigaha.
2. Waa imisa kiilomitir fogaanta tooska ah ee u dhaxaysa Qaahira (cairo) oo dhacda loolka $30^0$00W, dhigta $31^0$00B iyo Darban oo dhacda lool**ka $29^0$57'K**, dhigta **$30^0$ 59B**?
3. Markay saacada Dhig-dhexadu tahay 2:00pm (labadii duhurnimo), muxuu noqon waqti deegaanka.
   i. Sidhnii (dhigta $151^0$B)
   ii. Jikaago (dhigta $87^0$30G)
4. Hadii ay saacada Dhig-dhexadu (GMT) ay tahay 9:00 Am (9:00 subaxnimo) imisa ayay noqon saacada waqti deeganeed ee Itoobiya (dhigta $45^0$B)?
5. Faraqa saacadeed ee u dhexeeya dhigta $45^0$B iyo dhigta $75^0$G waa imisa?

6. Baraw u sharax ardayda sida uu janjeedhsiga dhulku marka uu ku wareegayo qoraxda uu u sababo
   b. xilliyada
   t. Kala duwanaanshaha dheeraanta ama kala badnaanta maalinta iyo habeenka.
7. U sharax faraqa u dhexeeya waqtiga la wadaago (sfandard time) iyo waqtiga Dhig-dhexada (GMT).
8. U sharax erayadan soo socda
   i. lool (barbaro)
   ii. dhig maldac
   iii. Dhig-dhexo

## 1.3 Qoysaska ama Bahaha Luuqadaha waa weyn Afrika

### 1. Ujeedada gaarka ah

***Markay bartaan qaybtan cutubka kadib, ardaydu waxay awoodi doonaan in ay:-***

- *Magacaabaan (sheegaan magacyada) Bah luuqadeedyada ee Itoobiya.*

### 2. Tusmada

- Qoysaska Luuqadaha waaweyn
- Kala saarida (kala qaybinta ama kala–soocida) iyo baahsanida bah luuqadeedyada ee Afrika.

### 3. Araar

Baraw waxaad qeybtan cutubka ka mid ka ah ku bari doontaa ardayda bahda ama qoysaska luuqada sare ee Afrika iyo baahsanidooda (meelaha lagaga hadlo) iyo sida ay u kala badan yihiin tirooyinka dadka ee ku kala hadla luuqadahaas (baahsanidooda).

Qoysaska ama bahda luuqadda sare ee Afrika, waxaa ka mid ah:-

1. Niijar – koongo:- waxaa aalaa lagaga hadlaa galbeedka Afrika iyo Jamhuuriyada dhexe ee Afrika.
2. Afroo –Aasiyaatic:- waxaa luuqadaha bahdan lagaga hadlaa waqooyiqa Afrika, Soomaaliya, Itoobiya, Eratariya iyo dhulka u dhaw harada Jaadh.
3. Nayloo – Saharaan:- waxaa lagaga hadlaa qaybta bari ee saxaraha intiisa badan, qaybta sare ee dooxada wabiga Niil, agagaarka harada figtooriya iyo Jamhuuriyada dimuqraadiga ee koongo.
4. Khoysan:- waxaa lagaga hadlaa koonfur–Afrika.

## 4. Hababka Baris Barasho

**B. Adeegsiga kaabayaasha wax-barista**

- Khariirad muujinaysa baahsanaanta Luuqadaha Afrika.
- Khariirad na tusinaysa baahsanaanta luuqadaha Itoobiya.

**T. Adeegsiga hababka barista.**

- Ka wada hadlid
- Muuqaal ku soobandhigid
- Sharaxaad.

**J. cashir diyaarinta ka hor**

- Ardayda koox-koox isugu habee
- Raadso khariirad muujinaysa baahsanaanta luuqadaha Afrika

**X. Soo jeedinta cashirka**

**B. Hordhaca cashirka**

Baraw u sheeg ardayda cashirku waxa uu ku saabsanyahay oo haka wada hadlaan.

Baraw bilaw cashirka adigoo xasuusinaya cashirkii ka horeeyey, waxaa waydiisaa su'aashan soo socota.

1. Sheega magacyada waddamada:
   b. Geeska Afrika?

t. Bariga Afrika?

**T. Nuxurka Cashirka**

- Baraw sii ardayda sharaxaad gaaban oo ku saabasan Bah luuqadeedyada Afrika.
- Sheeg ama magacaw Bah luuqadeedyada waa weyn ee Afrika?
- Waxaad waydiisaa in ay sheegaan qowmiyadaha ku nool Itoobiya ee luuqadaha ay ku hadlaan ka mid ka tahay bahda Afroo-Aasiyaatic?

## 5. Qiimaynta iyo dabagalka

**B. Qiimeynta**

Baraw waydii su'aalahan soo socda:

Ku qor meelaha banaan Bah-luuqadeedyada ay ka tirsan yihiin luuqadahan hoos ku qoran:

Luuqada Baantuu:______________

Luuqada Carabiga: ______________

Luuqada Samatik:_________________

Anuwaak iyo Nuweer: ______________

**T. Dabagalka la socodka**

Ha taxaan ardaydu luuqadaha Omotik, hana sheegaan qoyskooda.

# 1.4 Ilbaxnimadii Hore ee Afrika (Masaarida iyo Kaarteej)

## 1. Ujeedada gaarka ah:

***Marka uu dhamaado casharkan kadib, ardaydu waxay awoodi doonaan in ay:***

- *Tilmaamaan halka ay dhacaan masar iyo kaarteej oo kamid ah goobihii ilbaxnimooyinkii ugu horeeyay ee Afrika.*
- *Sharxaan faa'iidada ilbaxnimadii hore ee masaarida iyo kaartejka.*

## 2. Tusmooyinka

- Ilbaxnimadii hore ee masaarida ee masaarida ee dhanka Ahraamta, Taalooyinka, dadka, beeraha, ganacsiga iyo heroglaafiyaadda.
- Ilbaaxnimadii hore ee kaartejka.

## 3. Araar

Masar (Egypt) waxay ku taalaa waqooyiga Afrika. Dhanka waqooyi waxaa kaga xeeran badda meedhitiraa-niyaanka, dhanka bari waxaa ka ah lamadagaanada Siinaay iyo carabiya iyo Badda Cas.

Ilbaxnimada masaarida waxay khaas u sii ahayd ama ay ugu koobnayd waqooyiga. Masar waxaa looyaqaanaa ama aalaa loogu yeedhaa midii loogu deeqay wabiga Niil. Ilbaxnimada waxay ahayd mid la xidhiidha badda oo ay dhiseen fooniishiyaankii.

Beeraha ayaa ahaa wax-qabadka dhaqaale ee ugu weyn lbaxnimada masaarida. Masaaridu waxay Lahaayen hab – siyaasadeed horumarsan oo ay hogaaminayeen faraaciintu. Waxay caan ku ahaayeen xirfada dhisida Ahraamta Waxay soosaareen qoraalka heeroglaafiyadda. Waxaa kale oo ay isticmaali jireen in ay maydka qofka dhintay kaga ilaaliyaan dheecaanka dawo dhaqameed.

## 4. Hababka baris Barasho

**B. Adeegsiga kaabayasha barista**

- Khariirad muujinaysa meelahay ka jireen Ilbaxnimadii hore ee Afrika.

**T. Adeegsiga hababka barista**

- Sharaxaad qoraal kooban uu la socdo
- Ka wada hadlid ama ka wada doodid (Ku saabsan doorka uu wabiga Niil Ka ciyaaro nolasha masaarida).

**J. Cashir-diyaarinta horteed**

- Diyaarso khariirado iyo sawiro la xidhiidha kuna haboon cashirka.
- Diyaarso waxay ardayd qaban lahayd, shaqo akhris cashirka hortii

**Kh. Soo bandhigida cashirka**

**1. Hordhaca cashirka**

- Muxuu wabiga Niil muhiimka ugu noqday. Masar?
- Sheeg halka ay ku taalo masar?
- Waa maxay aasaaska dhaqaale ee masaarida?
- Maxaa kamid ahaa waxyaaba ay guulaha ka gaadheen ilbaxnimadii masaaridu.
- Ayey ahaayeen kuwii dhisay ilbaxnimadii kaarteejka.
- Maxaa sababay hoos u dhicii ilbaxnimadii kaartejka.

**2. Nuxurka Cashirka**

- Baraw waxaad sharaxaad gaaban ka bixisaa guulihii ay ka gaadheen ilbaxnimadii masaaridu.
- Sharax waxtarka dhaqaale ee uu wabiga Niil u leeyahay masar.
- Xoogga saar dhacdooyinka muhiimka ah sida dagaalkii Buuniga.

## 5. Qiimeyta iyo dabagalka

**B. Qiimeynta**

Su'aalahan soo socda oo kale waydii:

- Maxay yihiin qodobada keenay hoos-u-dhiicii ilbaxnimadii iyo dhicitaankii ilbaxnimadii masaarida?
- Ayey ahaayeen kuwii dhisay ilbaaxnimadii kaarteejka?
- Maxaa aasaas u ahaa dhaqaalaha kaartej?

**T. Dabagalka la socodka**

- Baraw sii ardayda su'aalo qoraal ah oo ku saabsan qodobada khuseeya cashirkan.
- Hubi shaqada guri ee ardayda
- Xoogga saar su'aalaha dulmarka ah ee naqtiimeed.

# 1.5 Qaramadii Guumeysiga ka hor jiray ee Afrika

**Xiisadaha waa 3 xiisadood.**

## 1. Ujeedada gaarka ah:-

***Marka uu casharkani dhamaado kadib, ardaydu waxay awoodi doonaan in ay***

- *Baadhaan guumeysiga hortii dhaqaalihii aasaaska u ahaa qaramadii maali iyo Funji.*
- *Inay muujiyaan bogid (u bogid) ay u bogayaan guulaha ay ka gaadheen dhanka dhismaha guumeysiga hirtii magaalo qaramadii Simbaabwi.*

## 2. Tusmada

- Simbaawi gumeysiga ka hor.
- Maali gumeysiga ka hor
- Funji gumeysiga ka hor.

## 3. Araar

Baraw ku bilaw qodobadan muhiimka ah ee soo socda.

Afrika waxay leedahay taariikh u gaar ah iyo ilbaxnimo ka horaysay xidhiidhka reer Yurub. Simbaawi (Zimbabwe) magaca ah waxuu ka yimid dhagaxa lagu dhiso dhismayaasha. Waxaa ilbaxnimada Simbaabwi aasaasay ama dhisay dadkii shoona. Qarnigii 15aad kadib waxaa badalay qaran cusub oo la yidhaahdo Miwene mutaaba, oo uu markii dambe xukunkeeda awoodeed uu lawareegay Boortuqiisko.

Qaar ka mid ah Magaalo qaram ooyinka caanka ahaa ee Galbeedka Afrika ayaa waxay ahaayeen boqor tooyadii Gaana iyo Maali oo ay hogaamiyayaasheedu khaas ahaan u lahaayeen horgalaha magac ee Mansa. Boqorka caanka ahaa ee maali, ee la odhanjiray Mansa Musa (1312 – 1337) ayaa ahaa midka koobaad ee qaata diinta Islaamka.

## 4. Hababka baris barasho

**B. Adeegsiga Kaabayaasha barista.**

- Khariirad taariikhi ah oo ay ku taalo meelaha ay boqortooyinkii hore ee Afrika dhacayeen (ku yaalleen).
- Khariirad muujinaysa Afrikada gumeysiga ka hor jirtay.

**T. Adeegsiga hababka wax-barista**

- Ka wada hadlid ama ka doodid
- Sharaxaad
- Muuqaal ku muujin

**J. Cashir diyaarinta ka hor**

- Diyaarso khariirado iyo sawiro
- Koox-koox u habee ardayda

**X. Soo jeedinta cashirka**

**B. hordhaca cashirka**

Ha ka jawaabaan ardaydu su'aalahan soosocda

- Waa qaybtee, qeybta Afrika ee ay ku taalo Simbaawidii weynayd (great zimbaabwe)?
- Maxay ahaayeen waxyaabaha ay guulaha waawayn ka gaadheen boqortooyadii Maali?
- Khariirad ku muuji halka saxda ah ee ay ku taalay funji.
- Kuma ayuu ahaa Mansa Mussa?

**T. Nuxurka cashirka**

- Sheeg ama sharax qaar ka mid ah horumaradii ama guulihii ay gaasheen boqortoyoo yinkii hore eeAfrika?
- Maxay ahaayeen sifooyinka guud ee Afrika gumeysiga ka hor?

Ha ka doodaan ardayda Afrika siday ahayd guumeysiga ka hor iyo kadib intii gacanta guumeystaha reer yurub gashay.

## 5. Qiimeynta iyo dabagalka

### Qiimeynta

Baraw waxaad ku qiimaysaa ama aad ku hubisaa fahanka cashirkan ee ardayda su'aalahan soo socda:

- Maxay ahayd sababta aasaasiga ee gumeystuhu?
- Maxay gumeystayaashii reer Yurub ahmiyada u siinayeen Afrika?
- Maxay ahayd ujeedada gumaystihii Borjiqiisku uu ka lahaa koonfur Afrika?

**Dabagalka:**

- Ardaydu ha ka shaqeeyaan su'aalaha dulmarka ah
- Hubi Jawaabaha ardayda.

# 1.6 Ganacsiga Masaafada dheeraa oo Ahaa Qodob Isku Xidha Dadka Itoobiya

## 1. Ujeedada gaarka ah

***Marka uu dhamaado cashirkan, ardaydu waxay awoodi doonan in ay:***

- *Fahmaan doorka ganacsiga masaafada dheer ee Itoobiya si uu isugu xidho dadka.*
- *Aqoonsadaan jiritaanka wadooyinka ganacsi ee Afrikada kale.*
- *Aqoonsadaan asaladoodii.*

## 2. Tusmada

- Ganacsiga masaafada dheer ee itoobiya.

## 3. Araar

Waa in hoosta laga xariiqo qodobadan soo socda meelaha ay **daboolayeen ama marayeen** wadooyinka (marinada) ganacsiga ee Boonga oo ahayd mid kutaala kaffa, koonfurta galbeed ee Itoobiya. Waxay ahayd mid hodan ku ah kheyraadyo farabadan. Waxaa kale oo ay wadadda ganacsi maraysay Gondhar

iyo Harar oo ku kala xidhnaa dakadaha massawa oo ku taalay waqooyig bari ee Itoobiya iyo saylac iyo Barbara oo kuyaalay dhanka koonfur bari.

Negadraas waxuu ahaa hogaamiyaha socdaalka ganacsatada. Waxaa jiray waxyaabo sharci ahaan iyo dhaqan ahaanba lahaa oo wax lagu kala qaadan jiray, sida cusbada Amoole oo kale. Qadaadiicda maariya Tareesa oo ahayd mid ay ganacsato ku soo sameysay Awsteriya kadibna soo galiyeen ayaa ahayd mida ugu qiimiga saraysay ee wax lagu kala iibsado ganacsigii masaafada fogaa.

## 4. Hababka Baris barasho

**B. Adeegsiga kaabayaasha barista**

- Khariirad muujinaysa wadooyinkii ganacsi ee Afrika.
- Khariirad muujinaysa wadooyinkii gacsiga Itoobiya.
- Sawirada dakadaha Adulis, saylac iyo masawa.

**T. Adeegsiga hababka wax-baris**

- Ka wada doodid ama ka wada hadal
- Muuqaal ku muujin
- Dulmar (mar kale ku celin)
- Su'aalo iyo jawaaba

**J. Cashir diyaarinta horteed**

- Diyaargarayso khariirado muujinaya jidadkii ganaacsiga ee Afrika.
- Khariirado ay ku yaalaan dakadihii muhiimka ahaa xiligaas
- Sawirada qadaadiicdii ama shilimaantii maariya Tareesa iyo Amoole (cusbadi wax lagu kala badalan jiran).

**X. Nuxurka cashirka**

baraw waa in aad xooga saartaa qodobadan soo socda:

- Waxyaabaha la dhoofin jray xiligaas waxay ahaayeen badanaa waxsoo saarka beeraha.

- Meelaha waxyaabahaas laga heli jiray intooda badan waxay ahayd koonfurta koonfurta Galbeed ee Itoobiya sida kaffa.
- Waxyaabaha lasoo dajisan jiray ama dalka la soo galin jiray waxay ahaayeen alaab warshadaysan sida dharka waxyaabaha la isku qurxiyo iwm.

Hogaamiyaha geedi socodka (socdaalka) ganacsi ee ganacsatada waxaa la odhan jiray Negadraas. Wuxuuna masuul ka ahaa isku habaynta ganacsatada iyo u diyaar garayntooda socdaalka dheer ay u diyaa rgaroobayaan.

Waxyaabaha dhaqameed ee wax lagu kala gadan jiray (lagu kala badalan jiray) waxaa ka mid ahaa cusbada gabal gabalka (cad – cadka) fidsan ahayd (Amole) ee ay markii dambe badashey qadaadiicdii ama shilimaantii maariya tareesa ee lagu soo sameeyey Awstiraaliya.

## 5. Qiimeynta iyo dabagalka

### B. Qiimeynta

Waydii su’alahan soo socda

- Muxuu kaga duwan yahay ganacsiga masaafada dheer ganacsiyada kale?
- Maxuu ahaa doorka masuuliyadeed ee Negadraaska?
- Maxay ahaayeen waxyaabihii ka soo baxay ama natiijoyinkii guud ee ganacsiga masaafada fog.
- Sidee ayey diinta Islaamku ugu faaftay goobihii ganacsiga masaafada dheera ee Afrika.

### T. Dabagalka

Baraw waydii oo u dir ardayda in ay ku qoraan qoraal gaaban oo ku saabsan socdaalkan ganacsi ee Itoobiya buugooda.

Ha qiimeeyaan faa’iidooyinkii dhaqaale, busho iyo siyaasadeed ee ganacsiga masaafada dheer ee Itoobiya.

# 1.7 Dadweynaha Qaaradda Afrika

**Xiisadaha waa 8**

## 1. Ujeedada gaarka ah

Markey bartaan qeybtan cutubka, ardaydu waxay awoodi doonaan in ay:

- aqoonsadaan qodobada saameeya baahsanida dadka.
- la xidhiidhiyaan qodobadan dagaameynta dadka Afrika iyo in ay tilmaamaan dagaamada khariirada dusheeda.
- sharxaan noocyada hab-nololeed ee deegaamada kala duwan ee Afrika.
- aqoonsadaan baahsanida dadweynaha Afrika gudaheeda.
- tilmaamaan meelaha dadku aadka ugu cufan yahay iyo meelaha uu ugu filiqsanyahay ee Afrika.
- la xidhiidhiyaan hab-nolaleedyada deegaamada kala duwan ee Afrika cimilada, dhirta iyo wadooyinka ama isgaadhsiinta.
- ka doodaan sababaha dagaamada magaalada keenya.

## 2. Tusmada

- Baahsanida dadka iyo dagaameynta
- Qodobada saameeya baahsanida, dagaamaynta iyo habnololeedka Afrika.
- Hab-nololeedka Afrika

## 3. Araara

Wakhti xaadirkan, tirada guud ee dadka aduunka waa 6 bilyan. Baahsanida dadka ee qaaradaha ma ay aha mid isku mid ah ama isla’eg. Dadku waxay dagaan meelaha ay ka heli karaan cunto iyo biyo. Dadyawgii hore waxay ilbaxnimadooda ka bilaabeen hareeraha dooxooyinka wabiyada. Si ay u fahmaan qodobada saameeya baahsanida dadka Afrika, waxaa muhiim ah in ardayda la siiyo wacyigalin ku saabsaan muuqaalada, cimilada iyo dhirta

qaarada Afrika. Arimaha dabiiciga ah ayaa ah qodobada ugu waawayn ee saameeya baahsanida dadka.

Dagaameynta magaalooyinka waa mid ka wada jirta dunida oo idil. Sanadka 2000 waxaa lafilayey in 50% dadka dunida ku nool ay kunoolaan doonaan magaalooyinka  xog la soo saaray 2005 tii ayaa waxay cadaynaysaa in 15 waddan oo Afrikaan ah kaliya dadkoodu uu ku nool yahay magaalooyinka.

Hab-nolaleedka dadka Afrika wuxuu ku tiirsan yahay beeraha, oo uu waliba wax-soosaarkoodu yahay quutul-maalmeed (mid u dhexeeya af iyo gacan). Dhulka la beeran karo ee afrika oo gaadhaya ilaa iyo 840 malyan oo hektaar ayaa ah mid $\frac{1}{3}$(saddex–meeloodkii meel kaliya) laga beerto (laga isticmaalo) wakhti xaadirkan.

## 4. Hababka baris – barasho

## 4.1 Adeegsiga kaabayaasha barista iyo tixraacyada.

- Khariiradaha muuqaal, cimilo iyo dhirta ee Afrika
- Atlaska (Addis Ababa)
- Buuga ardayga

## 4.2 Adeegsiga hababka wax baris

- Sharaxaad
- Ka wadahadlaan (ka wada doodid)
- Muuqaal ku muujin.

## 4.3 Cashir diyaarinta ka hor

- Diyaar garayso dhamaan khariiradaha, Atlaska iyo buuga ardayga.
- Xasuusi ardayda in ay ka soo akhriyaan cashirkan buuga ardayga ee ay haystaan

## 4.4 Soo jeedinta cashirka

### B. Hordhaca cashirka

Baraw ku bilaw cashirka su'aalahan soo socda.

- Dad Afrika intiisa badan halkay ku nool yihiin? Ma miyiga mise magaalooyinka?
- Ma ka tilmaani kartaa khariirada korkeeda meelaha dadku aad ka ugu cufan yihiin iyo meelaha ay ku filiqsan yihiin ee Afrika.
- Kuma ayaa sharxi kara sida ay cimiladu u saameyso baahsanida dadka kunool Bariga Afrika.

### T. Nuxurka cashirka

- U sharax waxa erayga dadweynaha uu ka dhigan yahay. Waa tirada dadka ku nool ama dagan meel, deegaan ama waddan.
- Sharaxaad ka bixi erayadan furaha ah ee cufnaanta dadka, saamiga kororoka, saamiga dhalasho iyo saamiga dhimasho hab-nololeed ka iwm.
- Ka dooda sababta ay dadku u jecel yihiin dagitaanka goob (meel) ee ayna doonaynin meelaha kale.
- Adigoo isticmaalaya khariiradaha buuga ardayga ku yaala (jaantuska 1.23, 1.24, 1.26 iyo 1.27) sharax sida ay waxyaabaha ama xaaladaha kala duwan ee dabiiciga ah u saameeyaan baahsanida dadka Afrika.
- Iyagoo isticmaaloya khariirad gacmeeda Afrika ardaydu ha isku-daydo in ay tilmaamaan meelaha uu dadku ku cufan yahay.
- Sharax adigoo tusaalayaal raacinaya sida ay qodobada lax idhiidha aadaamaha ay saameynta ugu leeyihiin dagaamada meelaha magaalooyinka ah.
- Adigoo soo qaadanaya wadooyinka gaadiidka (wadada tareenka ama mida gawaadhida), ha ka doodaan sida ay dagaamadu uga bilowdeen iyo siday u gaadheen ama u noqdeen magaalooyin iyo caasimado. Waxaad arintan tusaale oo gu soo qaadan kartaa magaalooyin ka mid ah deegaankeena. Hadaba majiraan magaalooyin ku yaala deegaankeena

soomalida (kililka 5aad) oo ka bilowday markoodii hore wadooyinkan oo kale?

- Ka dooda dhibaatooyinka ugu waawayn ee la xidhiida dagaamada magaalooyinka.
- Ka dooda hab-nololeeyada ugu muhiimsan ee kajira qaaradda Afrika.
- Ka dooda noocyada hab-beereed ee ugu muhiimsan ee ka jira dawladdaa deegaanka soomaalida.

## 4.5 Qiimeynta iyo dabagalka

**B. Waydii su'aalahan soo socda oo kale:**

- Sheeg meelaha dadku aadka ugu cufanyihiin ee Afrika?
- Maxay yihiin qodobada dabiiciga ah ee keena ama sababa cufnaanta dadka Afrika.
- Sheeg meelaha dadku ku filiqsanyahay ee Afrika?
- Maxaa sobabay filiqsanaanqaas (dad yaraantaas)?

**T. Dabagalka**

- Baraw ha booqato ardaydu goobo beera laga quto (dhul beereedyo) iyo goobo xoolaha lagu dhaqdo oo deegaankiina (aga gaari kiina ah).

## Misaalka Qorshaha Cashir Todobaadlaha

Magaca Baraha:___________________ Maadada:- ______________

Taariirkhda: ___________________ ilaa ___________ Cutubka:______________

Fasalka iyo Qaybta:_____________

Ardaydu waxay awoodi doonaan__________________

Ugu yaraan Ujeedada gaarka ah ee Cashir dhigista: _____________

| **Xiisada iyo maalinta** | **Tusmda** | **Wakhtiga** | **Kaalinta baraha** | **Kaalinta Ardayga** | **Kaabe yaasha** | **Agabka Tixraaca** | **Faallaa** |
|---|---|---|---|---|---|---|---|
| Isniin | | 5 daqiiqo | Hordhaca | | | | |
| | | 25daqiiqo | Soo Bandhiga | | | | |
| | | 5 daqiiqa | Gunaanad | | | | |
| | | 5 dadiiqa | Qiimaynta | | | | |

Faalada qorshaha ____________________________________________

____________________________________________________________

____________________________________________________________

Saxeexa Baraha Maadada __________________ Mad. Waax. ______________

Maamule ku xigaha ____________________

F.G:- Waa mid tusaale ahaan loogu diyaar iyay isniin oo keliya laakiin ay ujeedooyink iisu aad muhiim u yihiin oo loogu tala galay todobaadka oo dhan.

# Jawaabaha Layliga Guud

## I Run – Been

1. Run
2. Run
3. Run
4. Run
5. Been

## II Buuxi meelaha Bannaan

1. 70%
2. Boon, Agalhaas, Feerde, Gaardafuu
3. Kulaalaha waqooyi ee kansarka
4. Khadka kala qaybiya maalinta caalamiga

## III Jawaabo gaagaaban

1. Dhulbadhuhu waa xariiq-beenaad kaa soo dunida u kala qaybiya laba
2. Taasoo ay ugu wacan tahy:
   - b. malaha dhul-beereed badan oo dhinaca hab-nololeedkooda ah
   - t. waxay dalalka barig Dhexe ay u dhoofin jireen oo ay uga faaiidaysan jireen dhinaca ganacsiga.
3. b. Dadyawga dhaqamada kala duwam waxay ahaayeen. Kuwo uu ka dhexeeyo dulqaad iyo is-ixtiraam mudakar ah oo hana-qaaday.
   - t. maamulayaashii dagaamadaas u talinayay uuraha oo ay ka urursan jireen baayacmushtaradaas. Waxayna aad u xoojisay awoodoodii siyaasadeed dakhligii ay ka heli jireen.
   - j. Ganacsatadii dhul-goosiga ahayd waxay ka dhex sameeyeen maamuladii Oromada ee Gibee kadib markii ay ku dhaqmeen xeerkii Gedaha oo si tartiib-tartiib ah usoo yaraanayay.
   - x. waxqabadayadii Dhaqaale ee ay dadka badidiisu ku hawlabaayeen wuxuu ahaa dhinaca ganacsiga oo macno wayn ugu fadhiyay hab-nololeed kooda.
4. b. waa meelaha aadka u qalalan ee saxaaraha, kalahaari iyo Naamiibiya lamadegaanadood.
   - t. Keymaha rooban ee Badhtamaha Afrika.
   - j. Dhul-cawsedka

## IV Waxyaabaha in la qabto ay tahay

1. Sawirida khariidada Afrika yada oo ay ku mujinayaan meelaha ay dadku isku cufan yihiin
2. Saacada wakhtiga magaalada wardheer markay tahay 11:00pm

## V Ka dooro

1. t. Dhig-dhexada
2. t. Midna midka kale lama aha barbaro
3. j. Dhigaha ay dhacaan
4. b. Xirfadaha iyo qalabka casriga ah ee ay u adeegsadeen.

# CUTUBKA 2 QAABDHISMEEDKA DHULKA

## HORDHACA CUTUBKA

Cutubkan ardaydu waxay ku barandoonaan qaabdhismeedka dhulka-saddexda lakab, sameyska iyo noocyada dhadhaabaha. Waxaa kale oo ay baran doonaan habka loo isticmaalo ama loo helo xogaha khariirada kuyaala.

## Maxsuulka cutubka

Marka uu cutubka ani dhamaado, ardaydu waxay awoodi doonaan in ay:

- Tilmaamaan in saxamada dhulka ay dhaqaaqi karaan iyo inay dhalin karaan dhulgariir.
- Aqoonsadaan sameyska noocyada iyo isticmaalada dhaqaale ee dhadhaabaha.
- Sameeyaan khariirad gacmeed.

### Tusmooyinka Muhiimka ah ee cutubka 2aad

2.1 lakabyada dhulka

2.2 sameyska iyo noocyada dhadhaabaha.

2.3 Adeegsiga iyo xog ka helida khariiradaha

# 2.1 Lakabyada Dhulka

**Xiisadaha waa 4**

## 1. Ujeedada gaarka ah

*Marka uu dhamaado casharkani kadib, ardaydu waxay awoodi doonaan in ay:*

- *Tilmaamaan lakabyada dhulka*
- *Tilmaamaan waxyaabaha uu ka sameysan yahay dhulka qolftiisu (lakabka sare ee dhulka.)*

## 2. Tusmada

- Lakabka sare, lakabka dhexe iyo lakabka hoose ee dhulka.
- Waxyaabaha muhimka ah ee uu kakobnyahay lakabka sare (qolafta saree) dhulka.

## 3. Araar

Qaab dhismeedka dhulka waxaan ku matali karnaa ama aan tusaale wanaagsan inoo noqon kara ukun la kariyey labadooduba waxay ka kooban yihiin saddex lakab.

Marka aynu ukunta biyaha kulul lagu kariyey u kala goyno laba qaybood, waxaan arkaynaa qaybteeda sare oo qalafta dhulka oo kale ah, qaybta cadd ee dhexena waa lakabka dhexe ee dhulka iyo qeybta jaalaha ama huruuda ahna waxay u taagan tahay lakabka hoose ee dhulka.

In kasta oo qaybta dibada (ugu saraysa) ee dhulka ay tahay adke, gudaha lakabka sare ama lakabka sare gudihiisa waa dareere leh heer kul aad u sareeya.

Itoobiya waa waddan leh qaab sameys dhuleed oo kala duwan. Waxaa wanaagsan marka in ardayda la soo tuso muuqaalada kala duwan ee qaab sameyska dhulka deegaan koodu leeyahay iyo waliba muuqaalada dabiiciga ah ee agagaa kooda (deegaankooda).

# 4. Hababka baris barasho

## 4.1 Adeegsiga kaabayasha wax-baris iyo tixraacyada.

- Ukun biyo lagu kariyay
- Sawir wayn oo midabo tilmaamaya saddexda laka ee dhulka.
- Buuga ardayga.

## 4.2 Adeegsiga hababka wax barista

- Sharaxaad
- Ka doodid
- Muuqaal ku muujin

## 4.3 Cashir diyaarinta ka hor

- Diyaarso ukun biyo lagu kariyey

## 4.4 Soo jeedinta cashirka

**B. Hordhaca cashairka**

Baraw waydii ardayda su'aalahan soo socda oo kale:

- Maxaad ku qiyaasaysaa in uu dhulku ahaa xiliyadii ugu horeeyey?
- Kuma ayaa sharxi kara heerakii uu dhulka ka sameyskiisuu soomaray?
- Sidee ayuu dhulku yahay wakhti xaadirkan markaynu barbar dhigno meerayaasha kale?

**T. Nuxurka cashirka.**

- Sharax sida uu dhulku uga samaysan yahay (uga kooban yahay) lakabyada.
- Ardayda usoo bandhig ukun biyo kulkul lagu kariyey.
- Tus ardayda lakabyada ukunta biyaha lagu kariyey adigoo u kala jaraya laba waaxood (qaybood).
- U shaarax un acaddee ardayda baraw qodobada keena ama sababa dhaqaaqa saxamada.
- Adigoo adeegsanaya jaantuska 2.2 ee buuga ardayga sharaxaad kabixi dhaqaaqa saxamada.

- U sharax saameynta ay leedahay dhaqaaqa saxamadu.

### 4.5 Qiimeyntaiyo dabagalka lasocodka

**B. Qiimayn**

Baraw waydii ardayda su'aalahan soo socdaa kale:

- Sheega saddexda lakabyo ee dhulka?
- Muuxuu ka koobanyahay lakabka sare ee dhulka?
- Waa intee heerkulka qaybta gudaha ee lakabka hoose?

**T. Dabagalka la socodka**

- Ku boori ardayda in ay soo sameeyaan shay tusaale u ah saddexda lakab ee dhulka shaygaas oo ah mid ay ka heli karaan agagaarkooda.
- Ha ka doodaan sababta ay dhamaan saddexda lakab ee dhulka ayna u noqon in adke.

## 2.2 Sameyska Iyo Noocyada Dhadhaabaha

**Xisaduhu waa 2**

### 1. Ujeedada gaarka ah

***Marka uu dhamaado cashirkan ardaydu waxay awoodi doonaan in ay:***

- *Sharxaan sameyska dhadhaabaha*
- *Aqoonsadaan noocyada dhadhaabaha*.

### 2. Tusmada

- Sameyska dhadhaabaha
- Noocyada dhadhaabaha.

### 3. Araar

Dhadhaabuhu waa ashyaada ama waxyaabaha uu dhulku ka samaysan yahay. Dhadhaabuhu waxuu ka kooban yahay maadano isugu jira hal macdan ama in ka badan macaadin ka so jeeda waxyaabaha nool ah iyo walxo dhalo ahaan ah. Dhadhaabuhu waxay ku sameysmaan habab kala du waan markaa waxay leeyihiin noocyo kala duwan.

Dhadhaabayaashu waxay inoolee yihiin waxtaro dhaqaale. Hadaba baruhu waa in uu xadido waxtarada dhadhabayaasha.khariirad tilmaamaysa (caddaynaysa) baahsanida ayaa ah mid si aad ah loosoo koobay marka waa in ayna noqonin mid marinhabaabin keenaysa.

# 4. Hababka baris-barasho

## 4.1 Adeegsiga kaabayasha wax-barista iyo tixraacyada

- Muunad dhadhaabe
- Sawiro muujinaya dhadhaabayaal; muuqda
- Dhadhaabe aad ka soo qaaday dooxada wabiga idiinku dhaw

## 4.2 Adeegsiga hababka barista

- Sharaxaad
- Qeexid
- Goobo booqasho
- Shaqo kooxeed (u dir in ay soo aruuriyaan muunado, kala saaraan noocyada dhadhaabaha).

## 4.3 Cashir-diyaarinta horteed

U dir ardayda in ay soo aruuriyaanmuun ado dhadhaaba oo farabadan.

## 4.4 Soo jeedinta cashirka

**B. Hordhaca cashirka**

Baraw ku bilow su'aalahan soo socdoo kale:

- Maxay yihiin dhadhaabuhu iyo dhagaxaanta agagaarkiina?
- Waa kee nooca dhadhaabaha ah ee agagaarkiina ku badan?

**T. Nuxurka cashirka**

- Sharax sida ay dhadhaab u'hu ku sameysamaan (sameyskoodu yahay)
- Sharax noocyada dhadhaabaha.
- Baraw ardayda ka caawi in ay aqoonsadaan iyo in ay u kala soocaan (u kala saaraan) dhadhaabayaasha muunada ah dhadhaab shiileed, dhadhaab lakabeed iyo dhadhaab dhalan rogan.

Tusaale ahaan u soo qaadashada dhadhaab shiileeda waxay sugtaa sida ay dhadhaabuhu ugu kala duwan yihiin budada ama jidhiidha ay ka kooban yihiin. Hadii ay xabuubta ama wiriqda uu ka koobanyahay dhadhaabe ay tahay mid waaweyn (buur-buuran) oo si fudud loo arki karo jidhiidha (budada) dhadhaba has waa mid gawtiyo leh (aan sulub ahayn) oo uu dhadhaabaheeda samaykiisu qaadatay wakhti dheer in uu ku qaboobo kadibna kufadhiisto ama adkaado (isku-dhago oo waa dhadhaabe si aayar aayar ah (aan dhakhso) ama dagdag ahayn) u samaysma.

Laakiin haday xabuubta (iniinyaha) ama wiriqda ama burburka yar yare ee uu dhadhaabuhu ka kooban yahay (ka samaysan yahay) ay tahay mid yaryar ama daqiiqa ah oo aan si fudud indhaha loogu arki karin, jidhiidha dhadhaabahaswaa mid sulub ah oo uu dhadhaabaheeduna si dhakhsa ah (dag dag ah) u samaysmay. Xasuusnaw dhadhaab shiileeda sida aayarta ah u samaysma waa daahsoone, kuwa sida dagdaga ah u samaysmana waa dibad yaal.

Waxaad u isticmaashaa shaxdan ama jadwolka soo socda tixraac ahaan si aad ugu kalasaartid ama aad ugu kala qaybisid muunadaha dhadhaabaha saddexda nooc ee waaweyn ee dhadhaabuhu u kala baxaan.

| | Nooc dhadhaaba | Magaca dhadhaabaha | Dabcecadaha ama sifooyiikiisa |
|---|---|---|---|
| 1 | Dhadhaab shiiled | Giraaneyt | - Waa ay jiriir ama xabuub (iniinyo) waaweyn yihiini macdantiisu sida. Kuwartis mica.<br>- Aalaa midab iftiima ama dhakaak ayuu leeyahay |
| | | Baasalt | - Waxuu ka kooban yahay macdan jiriir ama iniinyo yar yar.<br>- Kuma jiro kuwaartis<br>- Midab madaw badan oo aan iftiin lahayn ayuu leeyahay |
| | | Obsiidiyaan | - Macdan qaruurada ueg |

| | | | |
|---|---|---|---|
| | | | - Wax jiriir ama iniinyo ah oo ka muuqda majiraan<br>- Marka uu kala jabo ama dilaaco wuxuu u eg yahay dhalo ama qaruurad kala jabtay sided. |
| | | Bumays | - Waxay macdantiisu u eg tahay budadaadu (jiriirteedu) kiriimka sidiisa oo kale oo waxuu leeyahay wax aad xumbo moodid.<br>- Badanaa midab dhalaala ama iftiima ayuu leeyahay. |
| 2 | Dhadhaab Lakabeed | Dhagax-cudeed | - Jidhiidh ama lniin yo yaryar oo burciid ah. |
| | | Sheel | - Badana midab madaw ama mugdi ah<br>- Waa midka oogu budaysan |
| | | Dhagax-dhanaan | Macdanta oogu badan waa kaalsayt<br>Waxaa uu leeyahay foosil (hadhaaga noolaha dhintay) |
| 3 | Dhadhaabdhalan rogan | Isleet | - Waa wax-adag oo cufan kana dhalaal badan qolof lka (oo ah dhagaxa ama dha dhaabaha uu kasoo jeedo). |
| | | Maarbil | - Waa macdan isugu jirta kaalsayt iyo dolomayt<br>- Wuxuu kasoo jeedaa dhadhaabaha Dhagaxa dhanaan |

Waxaad u sharaxdaa ardayda isku wereega dhadhaabe (sida uu dhadhaabe isugu badalo dhadhaaba kale).

U diyaargaree ardayda booqosho cilmiyeed ee ay u baxaan goob idiin dhaw oo aad ka heli kartaan dhadhaab ayaal muuqda oo kor u soo baxsan.

Ka dooda una sharax waxtaraka dhaqaale ee noocyada kala duwan ee dhadhaabe leeyihiin.

Samee jadwal (shax) madhan oo haka qayb qaataan ardayda hanaku buuxiyaan meelaha banaan dhadhaabaha aaga laga helo iyo waxtarkoodaba.

| Dhadhaabe | Agagaarka laga helo | Waxtarkiisa |
|---|---|---|
| | | |
| | | |
| | | |
| | | |
| | | |

## 4.5 Qiimeynta iyo dabagalka la socodka

**B. Qiimeynta**

Baraw waydii su'aalahan soosocda

- Waa maxay dhadhaab?
- Sidee ayey u samaysmaan saddextda nooc ee dhadhaabta?
- Sidee ayey dhadhabayaashu isugu badalaan nooc kale oo dhadhaaba.
- Maxay yihiin waxtarada dhaqaale ee dhadhaabaha agagaarkiina?

**T. Dabagalka la socodka**

ardayda ku boori in ay guryahooda dhigtaan ama u qaataan muunado dhadhaab.

U sheeg ardayda in ay soo akhriyaan buugaagta laybareeriga ee ay ka tixraaci karaan si ay uga jawaabaan su'aashan sidee ayey waxtarkooda dhaqaale ka sakaw dhadhaabuhu inooga caawiyaan in aan ogaano ama garano samayska iyo da'da dhulka? Hala wadaago hana iswaydaarsadaan macluumaadka iyo xogaha ay soo haleen ama soo aruuriyeen.

# 2.3 Adeegsiga iyo xog ka helidda khariiradaha

**Xiisadaha 6**

## 1. Ujeedada gaarka ah

***Marka uu dhamaado cashirkan ardaydu waxay awoodi doonaan in ay:***

- *Qeexaan erayga khariirad*
- *Sheegaan waxtarada khariirada.*
- *Sawiraan khariirad gacmeeda deegaankooda ama Afrika si ay u tilmaamaan dacalada xog waranka khariirada.*

## 2. Tusmada

- Adeegsiga ama isticmaalka khariirada
- Dacalada xog waran

## 3. Araar

Isticmaalka khariiradaha waa qodob aad muhiim ugu ah maadada cilmi bulsho. Iyaga oo aan baranin xirfadaha aasaasiga ah ee khariiradaha, ardayda waa ay ku adagtahay in ay fahmaan macluumaad ka ama xogaha kala duwan ee ku yaala khariirada dusheeda dhanka waxbarshadada dugsiga oo kaliya ma ay aha khariiradahuhu kuwo ka anfacaya ee xataa nolol maalmeedka sharkhsi kasta ayey waxtar u leeyihiin.

Khariiradaha ku yaala Atlaska ma ay aha kuwo ay ardaydu lajaan qaadi karaan oo la heer ah, marka waxaa lagama maarmaan ah in aynu ardayda barno halkay ay ka bilaabayaan iyo siday u khrin lahaayeen khariiradaha ee ay u fahmil ahaayeen isticmaalka iyo adeegsiga khariiradaha.

## 4. Hababka baris barasho

### 4.1 Adeegsiga kaabayaasha barista

- Khariiradaha darbiga la sudho
- Khariiradaha muuqaaleed
- Atlaska Addiis (2002 lagu daabacay Afka xabashiga).

## 4.2 Adeegsiga hababka barista

- Sharaxaad
- Ka doodid
- Shaqo fasal
- Booqasho gaaban

## 4.3 Cashir diyaarinta horteed

- Diyaar garayso khariirada deegaanka iyo koobiga Addiis Atlaas.

## 4.4 Soo jeedinta cashirka

**B. Hordhaca cashirka**

Baraw waxaad ku bilowdaa su'aalahan soo socda oo kale.

- Kuma ayaa inoo sharxi kara wadada uu soo maro marka uu iskuulka u soosocdo?
- Muuqaalo caynkee ah ayaad kaaga muuqday wadada hareeraheeda?
- Kuma/tuma ayaa inoo sheegi kara/karta waxyaabaha wadada hareeraheeda ka muuqday ee uu arkay isaga oo qaraabadooda ah booqanaya?

**T. Nuxurka cashirka**

- Waydii su'aashii hore oo kale dhawr arday kadibna ka ugu wanaagsan ka dooro.
- Markaa arday kasta waxuu maskaxdiisa ka sawiran wadada uu mari lahaa inta uusan socodkiisa bilaabin
- U sheeg oo ka dhaadhici ardayda in ay tani tahay waxa layidhaahdo khariirad maskaxeed. Waxaa weeye waxa uu shakhsi (qofi) ku sawirto maskaxdiisa.
- Qor dhamaan muuqaalada ay ardaydu ku soo arkeen wadadooda, kadibna u kala qaybi muuqaalada ay soo arkeen laba qaybood oo kala ah muuqaalada dabiiciga ah (physical) iyo muuqa alo dad-samee ah.

- U sheegana u ogolaw in ay waraaq la soo baxaan oo ay ku sawiraan khariirad gacmeeda wadada ama jidka ay dugsiga usoo qaadeen ama u soomareen
- U sheeg in ay qoraal ahaan sawir ahaan, iyo sumad ahaamba muuqaalada ku muujiyaan.
- U qeex erayga khariirad.

Khariiradu waa wax-utaagan dhamaan ama qeyb ka mid ah dhulka oo ku yaala shay fidsan.

Qeexidani ma ay buuxdo/ma dhamays tirno, laakiin waa ay kooban tahay si ay oo la sinaato uguna haboonaato heerka fasalka.

- Waydii ardayda su’aalahan maxay yihiin waxtarada khariiradaha?
- Ayaa isticmaala badanaa?
- Dagaankiina ma laga helayaa qof isticmala?

Ardaydu ha sawiraan khariirad gacmeed deegaankooda, xasuusi in ay u yeelaan fure khariiradooda.

## 4.5 Qiimeynta iyo dabagalka la socoodka

### B. Qiimeynta

Waydii su’aalahan soo socda oo kale:

- Maxaad ka fahanteen khariirad maskaxeed?
- Qeexa khariirada?
- Maxay yihiin waxtarada khariiradaha.

### T. Dabagalka la socodka

- Ardayda ka ka doodaan iyagoo Kooxa ah sida ay u sharxi lahaayeen ama u sheegi lahaayeen wadada ay mari doonaan inta ayna socdaalkooda bilaabin.
- Ku wargali in ay sawiraan khariirad gacmeed uu ku yaalo aaga ay ku noolyihiin oo leh xoggo ku yaala dacalada xog waran iyo fure ay ku jiraan muuqaalada dabiici iyo kuwa dad sameeba.

# Jawaabaha Layliga Guud

**I. Run – Been**

1. Been 2. Been 3. Been 4. Run 5. Run

## II Buuxi meelaha Bannaan

1. Bu'da (lakabka Hoose)
2. Marsinada siman
3. Lakabka sare
4. Buumis
5. Cadaadis iyo kul

## III Jawaabo Gaa-gaaban

1. Kaariirad maskaxeedu waa muuqaal ka goob ama meel ee aad maskada ku sawiratid ama kuugu sawiran, Khariirad Gacmeeduna waa khariirada aad gacanta ku sawirtid.
2. Waxtarad khariirada waxaa ka mid ah waxaa lagu aqoonsaadaa meeluhu halka ay ku yaalaan, waxay inoo caddeeyaan baalisanida kheyradka.
3. Cadaadisku waa midka ugu waxan inay adke noqdaan waxyaalaha dabiiciga ah ee laga helo qolofka sare ee dhulka dhexdeeda (gudaha). Gudaha dhulka ee hoose ilaa iyo haatan waxyaalaha laga helo waa kuwo dhalaalay, sidaa darteed shay kastaa wuxuu leeyahay heer kul ay ku dhalaalaan ugu dhowaan
4. Dhanka waqooyi waxaad ku arki karta dhul jog sare oo uu gaadhayo dhererkiisu 2,310m, H.B. Biyomareenadiisa ilaha ay ka soo burqaana halkaasaa laga helaa. Badhtamuhuna waa bannaano oo uu maro webi la yidhahdo ilaala ung qulqula bari ilaa galbeed

## IV. Ficil ku muujin

1. Arday walba ha soo sawiro khariirad gacmeed uu ku muujinayo wadada uu maro ee dhexaysa dugsiga iyo gurigooda.
2. Ardaydu ha soo aruurisoo dhagaxaan kala duwan kana caawi noocyadaay kala yihiin.

## V. Kadooro

1. b. Magama
2. t. Dhadhaab lakabeed
3. x. Waxaa loo adeegsadaa inay ku tusto magacyada shaqsiyaad taxan.

# CUTUBKA 3 GAYIGA IYO HAWLIHIISA

**Xiisadaha guud ee cutubkan waa 16 xiisadood**

## HORDHACA CUTUBKA

Cutubkan wuxuu ku saabsan yahay gayiga qaarada Afrika, Waxay dabooshaa (ku saabsan yahay) dhirta dabiiciga ah iyo xayawaanada duurjoogta, biyaha, carada, iyo hawada oo aan aad looguu dadaalayn balse. Ku salaysan heerka fasalka. Guud ahaan waa hordhaca cutubka oo waxay si aad ah ugu dadaali doonaan fasalada sare.

Tusaalayaasha dhibaatooyinka iyo caqabadaha iyo hawlaha dhawrida ayaa iyagana kamid ah.

## Maxsuulka Cutubka

Marka uu dhamaado cutubkan, ardaydu waxay awoodi doonaan inay:

- Inay aqoonsadaan baahsanida ama Isbaahinta, faa'iidada iyo qodobada waxyeeleeya ama saameeya dhirta dabiiciga ah iyo xayawaanada duurjoogga ah ee Afrika.
- Inay fahmaan sida loogeli karo iyo dhibaatooyinka dhanka kheyraadka biyaha lacabi karo.
- Inay fahamaan hababka loodhawro kheyraadka biyaha.

## Tusmooyinka muhiimka ah ee cutubka 3aad

3.1 Dhirta dabiiciga ah iyo xayawaanada duurjoogta ah.

3.2 Biyaha carrada iyo hawada

3.3 Talaabooyinka fara galineed ee la qaadayo si loo dhawro khayraadka dabiiciga ah.

# 3.1 Dhirta Dabiiciga Ah iyo Xayawaanada Duurjoogta Ah

**Xiisaduhu waa 6 siixadood**

## 1. Ujeedada gaarka ah

***Marka uu dhamaado cashirkani kadib ardaydu waxay awoodi doonaan:***

- *Inay aqoonsadaan iyo inay tilmaamaan dhirta dabiiciga ah ee Afrika khariirada dusheeda.*
- *Kala soocaan duurjoogta muhiim ka ah ee Afrika.*
- *Inay ka doodaan sida uu xidhiidhku uga dhexeeyo deegaankooda.*
- *Inay xaqiiqsadaan inay dhirta iyo xayawaanku qeyb ka yjihiin gayiga.*
- *Inay aqoonsadaan in ay xayawaanadu dabar gu'ii hadii laga baabi iyo sabooyinkooda.*
- *Inay ka doodaan qodobada aadamuhu ay ku waxyeeleeyaan nafleeyda duurjoogta ah.*
- *Inay ku fikiraan in aynu wax ka qaban karno isbedelka cimilada.*

## 2. Tusmada

- Baahsanida dhirta dabiiciga ah iyo xayawaanada duurjooga ah.
- Waxtarka dhirta dabiiciga ah iyo xayawaanada duurjoogta ah.
- Qodobada waaweyn ee saameeya dhirta dabiiciga ah iyo xayawaanada duurjoogta ah.
- Suulidda noocya badanta noolaha.

## 3. Araar

Adigoo kaashanaya khariirada Afrika ardayda bar noocyada iyo is baahinta dhirta dabiiciga ah ee Afrika. Noocyada dhirtu waa keymaleyda rooboon ee kulaalaha, safaanaha dhirta lamadagaanka, dhirta meedhitiraniyaanka iyo dhirta dhulka sare (Afro-albaynta).

Ha ka doodaan ardaydu qodobada saameeya koridda iyo isbaahinta dhirta keymaha.

Ha ka doodaan sababaha ugu waaweyn ee keena kala duwanaanta baahsanida dhirta ama keym aha ee Afrika.

Iyagoo koox koox ah ardaydu ha ka doodaan xidhidhka adage kadhe xeeya cimilada iyo dhirta dabiciga ah oo ha ogaadaan dhirtu in ay thay muraayad laga dhexarko cimilada.

Ardaydu waa in ay isbarbadhigaan nooc kasta oo dhir ah iyagoo eegaya cimiladooda sida caddadka roobka iyo heer kulka. Hadaan soo qaadano dhirta Afro-albaynta ee kutaala dhulka jooga sare ama dhulka sare ee kulaalaha. Waa in ay ardaydu ogaadaan saamaynta uu joogu ku leeyahay cimilada iyo dhirta.

Tani waa xaalad ka dhacda ama caadi uga jirta dhulka sare ee Bariga Afrika.

Sharax waxtarada dhirta dabiiciga ah

Ardaydu ha sheegaan xayawaanada ku nool deegaamada kaladuwan, hana taxaan ama magacaabaan xayawaanada kunool in ka badan hal nooc oo dhir ah.

Kaymuhu (Aydu) waa sabada ama hoyga xayawaanada duurjoogta ah. Maxaa ku dhici xayawaanadan hadii hoygooda ama sabadooda laga baabi iyo?

Ardaydu si koox-koox ah ha uga doodo arintan, hana ka doodaan natiijadeeda dambe ama cawaaqib xumada arintaasi ay keenayso.

Uqaybi ardayda dhawr kooxood kadibna ha ka doodaan saameynta aan uroonayn ee ay leedahay dhir xaalufintu iyagoo eegaya ama ka duu laya:

- Guud ahaan gayiga
- Faa'iidada dhaqaale
- Qiimaha quruxda
- Cilmibaadhista caafimaad iyo sayniska.

Waxaad ardayda waxoogaa sharaxaad ah kasiisaa qodobada ugu waaweyn ee saameeya dhirta dabiiciga ah iyo xayawaanada duurjoga ah.

Qodobadan ku wooda aadamiga ah waxaa ka mid ah, qodobka ugu halista badan ee ah wacyigalin la'aanta. Qodobada dabiiciga ah waa gubashada iyo cimilada.

Wadamada soo koraya, gaara haan Afrika dhibaatada ugu daran ee saamaysa kheyraadka waa baahida xad ka baxa ah ee dhakhsa u korarka dadweynaha uu keeno.

Beeraha (beer qodashada) oo ah mid ay dadka Afrika intiisa badan ku tiirsan yihiin cuntada ka soo go da ayaa ah mid keenta baahida dhulka la beerto ay u qabaan dadku kadibna waxay arintaasi keeni dhirta oo la xaalufiyo, carada oo nabaad guur ku dhaco dabar go’a xayawaanada duurjoogta iwm.

## 4. Hababka baris barasho.

### 4.1 Adeegsiga kaabayaasha barista

- Khariirada Afrika
- Addiis Atlaas (Amxaari)
- Sawiro iyo
- Filimo

### 4.2 Adeegsiga hababka wax-barista

- Sharaxaad
- Dood kooxeed
- Hawlgalo fasal

### 4.3 Diyaarinta cashirka ka hor

- Isku xidh khariirada dhirta Afrika iyo koobiga Addis Atlas
- Raadi qalab ku caawiya
- Ku wargali ardaydaada inay soo aruuriyaan xoggaha dhirta dabiiciga ah iyo xayawaanada duurjoogta ee Afrika iyo dhibaatada hadda jirta ee isbadalka cimilada iyo lama dagaanaynta.

### 4.4 Soo jeedinta cashirka.

**B. Hordhaca cashirka**

- Waxaad arimaha wakhti xaadirkan jira ama cusub ee laxidhiidh dhibaatoo dhibaatooyinka deegaanka.
- Waxaad ku bilaabi kartaa cashirka su’aalahan soosocda oo kale.
- Sheega waxtaraka keymaha (ayda) iyo xayawaanada duurjooga ah?

- Maxay dadku u isticmaalaan geedaha?
- Waa tee qeeybta Afrika kamidka ah ee sida aad ka ah looga xaalufiyo dhirta (dhir xaalufintu sida aadka ah uga dhacdo)?
- Tilmaam ama sheeg qaar kamid ah sa ameynta ama natiijooyinka xun xun ee ay dhir xaalufintu keen to?
- Maxaa talaabooyin ah oo haboon in laqaado si xal loogu helo dhir xaalufinta Afrika.

**T. Nuxurka Cashirka**

Uhabee ardayda dhawr kooxood oo tira-yar, kadibna ha kadoodaan nocyada ugu muhiimsan iyo isbaa hinta dhirta dabiiciga ah iyo xayawaanada duurjoogta ah ee Afrika.

- Ka dooda sameynta dagdaga ah ee ay dhir xaalufintu leedahay.
- Kadooda xayawaanada kunool deegaamada ka laduwan.
- Tus sawiro ay kuyaalaan xayawaanada kaladuwan ee laga helo Afrika.Tusaale. Waaliya ibekis dameer farawga, maroodiga iwm.
- Ardaydu ka doodaan dhakhso u suulitaanka noocyo badanta noolaha ee ay sababeen arimo la xidhiidha aadamaha (dad-samee) iyo kuwo dabiici ah.
- Sharaxaad kabixi sida uu mustaqbal ka xayawaanada ugaar ka ah Afrika no qonayo hadii talaabooyin laga qaadin dhamaan waxyaabaha waxyeeleeya deegaanka.
- Kadooda xayawaanada dhifdhifka ah (kuyar) iyo kuwa ugaar ka ah Afrika iyo meesha lagahelo.

## 4.5 Qiimaynta iyo dabagalka la socodka

**B. Qiimaynta.**

Waydii ardayda su’aalahan soosocda

- Sharax xidhiidhka kadhexeeya cimilada iyo dhirta.
- Kadooda qodobada saameya dhirta dabiiciga ah.
- Sheega qaar kamid ah waxtarada dhirta dabiciga ah iyo xayawaanada duurjoogta ah.

- Waxyeelaynta dhirta dabiiciga ah waxa kadhigantahay baabinta xayaw aanda duurjoogta ah.

Sharax arinta oo tusaalayaal ku haboona ka bixi.

**T. Dabagalka la socodka**

- Ardaydu daraasaadyo ha ku soo sameeyaan arimahan soo socda.
- Dabar-go’a xayawaanada duurjoogta ah Baabili ee uu sababtay xaalufinta dhirta.
- H orusocodka degaamada ay horay ugu sii durkayaan beerta qaranka ee lagu dhawro xayawaanada du urjoogta ah. Tusaale Buurta Baalee iyo Beerta qaranka ee Nejsaar.

# 3.2 Biyaha, Carrada iyo Hawada

## 1. Ujeedada gaarka ah

***Marka ay bartaan qeybtan cutubka ka midka ah, ardaydu waxay awoodi doonaan in ay:***

- *Sharxaan xidhiidhka udhexeeya aadamaha iyo biyaha.*
- *Inay is barbardhigaan farqiga kala ah helitaanka iyo yaraanshaha biyaha lacabbo ee Afrika.*
- *Inay sa adaaliyaan sababaha gundhiga u ah khatarta kajirta biyaha lacabo ee Afrika.*
- *Inay tilmaamaan ama ay aqoonsadaan halista ka jirta khayraadka carrada ee Afrika.*
- *Inay baadhaan sababaha dhaliya diqawga magaalada.*

## 2. Tusmada

- Waxtarka ay biyuhu u leeyihiin nolosha.
- Sababaha dhibaatooyinka biyaha iyo biyaha la cabi karo ee Afrika keena.
- Waxyeelada kheyraadka carada ee Afrika.
- Sababaha dhaliya diqawg magaalada.

## 3. Araar

- Saynisyahanadu waxay xaqiijiyeen in biyaha darayga (macaan) ee ku jira dhulka ay yaryihiin. Biyaha nadiifta ah intooda badan iyagoo baraf ah ayaa waxay ka jiraan meelaha aan la gaadhi Karin ee dhulka ka mid ka ah. In kastoo ay biyaha macaan ay kuyaryihiin aduunka, hadana Afrika markii labarbar dhigo meelaha kale ee dunida waa mid hodan ku ah dhanka khayreedka biyaha.
- Waxaase layaab leh in Afrika iyadoo hodan ama qani ku ah khayraadka biyaha hadana kajirto biya la'aan ka haysta labada dhinacba labadaas dhinac oo kala ah dhanka wa xsoosa arka midhaha iyo biyaha loo isticmaalo hawlaha ha guriga sida kuwa nadiifta ah ee la cabi karo ku isku nadiifiyo wax lagu karsado iwm.
- Biyuhu waa khayraad muhiim u ah caafimaad ka wanaagsan.
- Waxaa jira saddex sababood oo ay biyuhu muhiim ugu yihiim aadamaha biyuhu
    - Waxay qaboojiyaan jidhkeena
    - Waxay socod siiyaan cunada aynu cuno
    - Waxay dhex galiyaa kiimikaalada jidhkeena.
    - Waxay qaadaan qashinka jidhkeena oo ay dhaafiyaan.
- Biyayawga wabiyada iyo harooyinka ayaa labadooduba waxay yihiin kuwo aan si isla'eg ama isku mid ah ugu baahsanayn Afrika. Waxyaaba ugu waawayn ee arintay sababay waxaa ka mid ah kala duwanaansha roob ee deegaamada kuyaala qaarada.
- Celceliska qofk waayeelka ah waa in uu cabo 2 litir oo biya ah maalin kasta.
- Dadka Afrika waxay isticmaalaan biyo kayer kuwo laga isticmaalo wadamada horumaray.
- Helitaanka iyo caddada biyaha la cabi karo waxay ku xidhan tahay heerka horumarka dhaqaale uu yahay.
- Dhibaatooyinka ugu waawayn biyaha la cabo haysta waxaa ka mid ah diqawga ama wasa khawga.

- Biyaha waxaa wasakheeya ama diqawga ku keena waxyaabaha sunta ah ee ka soo baxa warshadaha, kumikaalada bacriminta iwm.
- Soo qaado wabi udhaw magaalada aad dagantahay oo baadhitaan kusame, kalana qaybi meelaha ay ka imanayaan ama ilaha u ah wasakheeyayaalka.
- Hawada waa qodob aad deegaanka muhiim ugu ah si aynu ugu noolaano. Hadaba hawadu ma ay aha mid 100% nadiif ah. Dhibaatada ugu way nee hawaduna waa diqawga.
- Hadii uu diqaw ku dhaco hawada inagu xeeran, waxay sababaysaa cuduro kala duwan. Wasakheeyayaasha hawadu waxay ka soo baxaan warshadaha, gaadiidka, waxyaabaha tamarta ah ee la shito, kumikaalada, 1wm.
- Carradu waa khayraadka dabiiici ah oo muhiim ama waxtar balaadhan inoo leh oo uu hadana saameeyo diqawgu
- Carrada waxaa xumeeya ama yareeya (dhima) qodobo) dhawr ah sida.

Roob aysiidheedka ay sababaan gaasaska kala duwan ee ka soo baxa warshadaha iyo Talaagadaha.

Warshadaha ayaa ah kuwo si aan xad lahayn u wasa kheeya deegaanka oo hadhaaqooda iyo qiiqa ka baxayaba uu waxyeeleeyo dhamaan deegaanka.

Walxaha kliemikaalad sida biraha lagu daadiyo dhul beereedyada ayaa iyana carada waxyeel eeya.

Ardaydu baadhitaan ha ku sameeyaan dhul beered oo ha kala cadeeyaan in uu carradaas diqaw ku dhacay iyo inkale.

Waxyaabaha lagu bacrimiyo carrada iyo sunta cayayaanka ee lagu buufiyo iyana saamayn ayey ku leeyihiin carrada.

Hab beerashada aan haboonayn iyo falidda xad ka baxa ah waxay carrada u horseedaan carro-guur.

Diqawga hawada waxuu aad u saameeyaa magaalooyinka.

Diqawga hawada kuma uu koobnaado deegaan ama wadan kaliya. Wasakheeyayaasha ka jira goob ayey hawadu intay kaqaado goobtaas ayey gayni meela kale oo dunida kamid ah.

Wasakheeyayaasha magaalooyinka waxay ka dhashaan ilo kala duwan.

Dhibaatada kale ee ay wasakhaynta hawadu sababto ayaa waxay tahay roob aysiidheedka roobkan waxuu sababaa xanuuno ku dhaca aadamaha iyo waxyeelooyin uu gaadhsiiyo midhaha iyo koritaanka dhirta.

## 4. Hababka baris barasho.

## 4.1 Adeegsiga kaabayaasha barista iyo tixraacyada.

- Khariirada siyaasadeed iyo mida muuqaaleed ee Afrika.
- Sawiro muujinaya warshadaha (Adiis Ababa).
- Sawirka (footada) Adiis Ababa.
- Sawiro (footo) nat usinaya ama muujinaya meelo qashinka lagu qubo

## 4.2 Adeegsiga hababka barista

- Dood kooxeed
- Sharaxaad
- Hawlgal fasal
- Booqasho wax lasoo indha indheeyo

## 4.3 Cahir diyaarinta horteed

- Soo aruurso khariirada webyadaa Afrika
- Soo aruurso muuqaalo iyo sawiro
- Soo akhriso buugaag aad ka heli kartid xogo dheeraad ah oo kaa caawiya qodobka aad ka hadlaysid.

## 4.4 Soo jeedinta cashirka.

### B. Hordhaca cashirka

Baraaruji oo caajis bixi ardayda kolk ahore adigoo ku bilaabaya su’aa lahan soo socda:-

- Waa tee qaybta Afrika ee ugu badan yihiin biyaha macaan (darayga ah)?
- Kheyraadka biyaha ee Afrika ma mid dheelitiran baa ama si siman oo isku mid ah u baahsanbaa?
- Afrika waa qaarad qani ama hodan ku ah khayraadka biyaha laakiin dadkeeda waxaa haysta biya yaraan ka haysata dhanka biyaha la cabi karo ah, maxaa sababay?

**T. Nuxurka Cashirka**

- Ka dooda faraqa kala duwanaansho ee u dhexeeya biyaha macaan iyo biyaha badda (cusbada leh).
- Sharax sida ayna isule'ekayn ama iskumidka ayna u ahayn baahsanaanta biyaha macaan ee Afrika.
- U sharax waxtarada noocyada badan ee biyaha.
- Sharax sababaha keena dhibaatooyinka biyaha la cabo.
- Koox-koox ha uga doodaan ilaha biyaha, iyo diqawga biyaha iyo hawada.
- Ka dooda ama cadeeya wasakheyayaalka biyaha iyo hawada.
- U sharax sida ay u saamayso ama saamaynta ugu leedahay diqawga carada uu ku dhaco caafimaadka aadamaha.
- Ka dooda qoodobada dhaliya diqawga magaalada.
- Ka dooda sababta ay cimilada magaaladu uga diiran tahay cimilada miyiga u dhaw.
- Sharax saameynta aadka u daran ee diqawga hawada magaaladu leedahay.
- Qeex doorka ay ka ciyaaraan UNEP da (oo ah waaxda qaramada midawday) u qaabilsan ilaalinta deegaanka) ilaalinta ama dhwrida deegaanka iyo hawlihiisa.

## 4.5 Qiimeynta iyo dabagalka la socodka

**B. Qiimaynta**

- Su'aal ardayda in ay tilmaamaan khariiradaha biyaha ee Afrika.

- Kadoodaan ilaha diqawga biyaha, hawada iyo carada ee Afrika ha sharxaan sida uu Dahaadhka inaga difaaca falaaraha cadceedu (Ozon) u khafiifo iyo saameynta uu ku leeyahay aadamaha, iyo dhirta iyo midhaha.

**T. Dabagalka la socodka**

- Ardayda kooxo u qaybi kadibna daraasaad ha ku sameeyaan isbadalka cimilada ee u sababo diqawga hawada magaalooninka.
- Ardaydu ha samaaynaa isbarbarshiga baahsanida khayraadka biyaha ee shanta deegaan ee qaarada Afrika iyagoo ku sawiraya kuna tilmaamaya khariirada Afrika.

# 3.3 Tallaabooyinka Dhawrista Khayraadka Dabiiciga Ah

**Xiisadaha 6**

## 1. Ujeedada gaarka ah ee ugu yaraan cashar dhigista

***Marka uu casharkani dhamaado kadib, ah, ardaydu waxay awoodi doonaani.***

- *Inay Laxidhiidhiyaan dhawridda dhirta dabiiciga ah khayraadyada kale ilaalintooda.*
- *Inay ka doodaan xakameynta diqawga biyaha iyo hawada.*
- *Inay muujiyaan xiisaha ay u qabaan ka qayb galka ilaalinta nadaafada biyaha si loogu isticmaalo guryaha.*

## 2. Tusmada

- Dhawridda dhirta dabiiciga ah waa fure
- Sida loo xakameeyo diqawga hawada iyo biyaha.
- Isticmaalida hababka la isku badbada likaro ee dhawridda
- UNEP (oo ah jimciyadda Quruumaha Midoobay ee barnaamijka deegaanka iyo waajibaadka Aadmiga).

## 3. Araar

- Biyaha, iyaga oo aan la'eegaynin waxtarkooda, ayey aadamuhu u isticmaalaan si aan wanaagsanayn (baytimaaliyaan).
- Biya yaraanta iya nadaafad darada ayaa ah carqalada ugu waynee caafimaadka magaalooyika wadamada soo koraya ee itoobiya oo kale ah. Cadada tiro ee dadka aan helin biyo kufilan oo la cabi karo agagaarka guryahooda ayaa ah kuwo aad u tira badan.
- Afrika markaynu eegno xaalku waa mid meel kasta oo kale oo jirtaba aad uga sii xun ama uga daran. Tusaale ahaan Itoobiya 97% oo biyaha macaan ee ay hasho ah ayaa waxay u gudbaan dawladaha ay dariska yihiin oo iyada way dhaafaan (daad ahaan ayay iyagoo dhulka dulsocda ayey dhaafaan), halka 3% ee usoo hadhayna ay tahay mid aan kufilayn oo aan si wacan ama wanaagsan loo isticmaaliin (si xun loo isticmaalo) ama si khalad ah loo isticmaalo oo xataa uu ku jiro diqaw.
- Markaynu eegno xaalka magaalada Adiis Ababa, in kabadan 29% oo dadka deegaanka ah ee magaalada dagan ayaan helin adeega nadaafadeed 43% ayaa suuliyada bulshada ka dhexeeya ama ay wadaagaan isticmaala, 90% in dhana ma ay Laha xamaamyo qubays oo casri ah ama caadi ah. Qaar badan ayaa suuliyadooda (musqulahooda) ay ku daraan ama ku xidhiidhasan yihiin togaga u dhaw. Dhibaatooyinka ay ka midka yihiin yaraanta biyaha la cabi karo iyo qalabka ama adeega nadaafadeed ee isna ku yar ayaa kamid ah waxyaabaha ka qayb qaata ama sababa dhiimashada dadka ee Adiis Ababa.
- Sharax talaabooyinka dhawrida ee ku yaala buuga ardayga.
- Ka dooda sida loo dhawro biyaha, hawada iyo carrada. Isku day in aad tusiso ama tustid xidhiidhka hubaasha ah ee ka dhexeeya dhawrida dhirta dabiiciga ah iyo dhawridda biyaha, carada iyo hawada.
- Ku war gali ardayda in ay isticmaalaan hababka doorashada leh ee dhawrida.

- Ka dooda howlaha ugu waaweyn ama ugu muhiimsan ee UNEP-da (Jamciyada quruumaha midoobay ee barnaamijka deegaanka iyo waajibaadka dadka u xil saran) ee dhanka ilaalinta deegaanka qaarada Afrika.
- Hadafkeeda ama ujeedada ugu wayn waa in ay gacan ka siiso wadamada Afrika siday u isticmaali lahaayeen khayraadka dabiiciga ah. Waxay si gaar ah uga shaqaysaa ama ay u khusaysaa dhawridda dhirta dabiiciga ah, xayawaanada duurjoga ah, carrada iyo biyaha.

## 4. Hababka baris barasho

### 4.1 Adeegsiga kaabayaasha barista iyo Tixraacyada.

- Sawir (footo) oo muujinaya talaabooyinka dhawridda biyaha ee agaagaarkiina ama dagmadiina.
- Sawiro footo oo muujinaya talaabooyinka dhawridda dhirta dabiiciga ah iyo carada.

### 4.2 Adeegsiga hababka wax barista

- Dood koo xeed
- Sharaxaad
- Hawlgal fasal
- Agagaarka soo indhadhayn

### 4.3 Cashir- diyaarinta ka hor

- Diyaar haku ahaadaan sawiro (footo) oo muujinaya diqawga biyaha iyo carrada.
- Khariirada Afrika iyo Itoobiya
- Adiis Atlas (Amxaari)
- Sawiro kutusinaya
    - Jinsiyo kala duwan oo geedaha kaynta ah xaalafinta dhirta.
    - Xayawaano duurjoog ah oo kala duuwan iyo seeraha qaran ee lugu xanaaneeyo xayawanada oo iyana kala duwan.

## 4.4 Soojeedinta cashirka

### B. Hordhaca cashirka

Waxaad baraw ku bilaabi kartaa cashirka su'aalahan soo socda:

- Sheega waxtarada xayawaanada duurjooga ah iyo kaymaha (ayda).
- Sidee ayaad isula xidhiidhin lahaydeen dhawrida dhirta dabiiciga ah iyo dhawridda ama ilaalinta biyaha hawada, xayawaanada duurjoogta iyo carrada.
- Caawimo ama taageero noocma ah ayey UNEP-du (jamciyadda quruumaha midoobay ee baranamijka deegaanka) siisaa wadamada Afrika intooda badan?

### T. Nuxurka cashirka

- Ka dooda sida ay dhirta dabiiciga ah furaha ugu tahay dhawridda khayraadyada kale.
- Sharax sida loo xameeyo diqawga hawada iyo biyaha iyo sida loo isticmaali karo hababka kala duwan ee dhawridda.
- Ka dooda UNEO-da ujeedadeeda ugu waynee ilaalinta deegaanka Afrika.

## 4.5 Qiimaynta iyo dabagalka la socodka

### B. Qiimaynta

Waydii ardayda su'aalahan soosocda

- Ka dooda kadibna soo jeediya afkaartiina ku aadan xidhiidhka ka dhexeeya dhawrida dhirta dabiiciga ah iyo khayraadyada dabiiciga ah ee kale.
- Waa maxay sababta aynu u dhawrno wreeno khayraadka dabiiciga ah.

**T. Dabagalka la socodka**

- Waxaad dajisaa baraw mashruuc ama qorshe ay ardaydu kaga qayb qaadanayaan hawlaha biyaha nadiif ahaanshahooda lagu dhawrayo ee Dugsigooda ama magaalada ay dagan yihiin.
- Ardayda u qaybi saddex-koo xood kooxi ha ka soo wada hadasho sida loo dhawro dhirta, koox kalena ha ka soo doodaan sida loo dhawro biyaha kooxda sadexaadna hak asoo doodaan sida loo xakameeyo ama looga hortago diqawga hawada. Koox kasta waxay iska dhex dooran qof fasalka ama ardayda fasalka hortooda ka soo jeediya warbixintooda. Ha ku qoraan waxyaabaha ay soo go'aamiyeen sabuurada dusheeda oo barahuna ha buuxiyo waxyaabaha ka dhiman.

# Jawaabaha Layliga Guud ee Cutubka

## I Run – Been

| | | | |
|---|---|---|---|
| 1. | Been | 3. | Been |
| 2. | Run | 4. | Been |

## II Buuxi Meela Banaan

1. Kaymalayda rooban ee dhul-badhaha kulaa layaasha
2. Roob yaraan, uumi-baxa aadka u sareeya, heerkulka sare, iyo xoogaaga yare e dhirta ama aan jirinba
3. Bariga iyo koonfurta Afrika
4. Wasakhaw

## III Jawaabo gaagaaban

1. Cimilaada (Roobda'a iyo H/kulka u badan) carro, ilima aragtayga, Biyo mareenada iyo kala saraynta.
2. Dhawritaan waxaa looga jeedaa habsami u adeegsiga khayraadka dabiiciga ah.
3. Dhirta oo la xaalufiyana waxa ay saamaysaa xayawaan kii iyo dhirtii deegaan lagu yaqaanay waxaana sidoo kale saamayn ku leh dabka ugaadhisiga abaaraha iyo lamadegaamayinta
4. Meega dib-u-dhirayn, qodaal marsino siman qodaalka
5. Afrika waxay ka mid tahay qaaradaha hodanka ku ah biyaha balsa dhibaatooyin ay ka mid tahay mid dhaqaale ayaa qaarada u suuragalinin ay biyaheeda ka faa'iidaysato.

## IV. Ficil waxqabad ku muujin

1. b. Dhirta kala duwan ee kordhaysa
2. b. Cimiladaa Baadka gobamisa
3. t. Baadku isku dhafka ah ee kulaalaha cawskaa ugu caansan.

## V . Ka dooro

1. B
2. B
3. T

Cutubka 4

# ARRIMAHA DADWAYNAHA

**Xiisadaha guud ee cutubka 4aad 17 xiiso**

## HORDHACA CUTUBKA

Cutubkan ardaydu waxay ku-baran doonaan arrimaha dadweynaha ee wakhti xaadirkan taagan iyagoo si gaar ahna xooga u saaraya Afrika. Ciwaanada (cashirada) qaarkood waxaad kusoo aragteen fasalada hoose, balse halkan waxaan ku baranaynaa inagoo u guda galayna si ka yara qota dheer sidii hore waxaana ku baran doontaan fasalada sare, waxaana sababay midan arrinta oo ah mid aad saameyn ugu leh dabeecadaba shakhsiyaadka, wadanka iyo qaaradaba.

## Maxsuulka Cutubka

***Marka uu dhamaado cutubku,ardaydu waxay awoodi doonaan:***

- Inay baadhaan saameynta uu cudurka Ej-Ay-Fi/Aydhiska– ku uu ku leeyahay dhaqaalo bulsheedka Afrika.
- Inay xaqiijiyaan saameynta maamul-suuban la’aanta Afrika.
- Inay aqoonsadaan xidhiidhka Juqraafiyeed iyo hadafyada urur – goboleedyada Afrika.
- Inay baadhaan saameynta uu leeyahay kororka dhaqsaha ah ee dadweynaha Afrika.

## Tusmooyinka Muhiimka ah ee Cutubka 4aad

4.1 Arrimaha La xidhiidha dadweynaha

4.1.1 Faafidda iyo saameynta Ej-Ay-Fi/Aydhiska ka ee Afrika.

4.1.2 Natiijada ama cawaaqibka (waxyaabaha ka dhasha) kororka dhakhsaha ah ee dadka.

4.2 Arrimaha xuquuqda iyo badbaadada

4.2.1 La dagaalanka ku gaboodfalka xaquuqda caruurta

4.2.2 Maamul suuban La'aanta Afrika.

4.3 Barnaamijayada iskaashiga

# 4.1 Arrimaha La Xidhiidha Dadweynaha

### 4.1.1 Faafidda iyo saameynta Ej-Ay-Fi/Aydhiska ka ee Afrika

## 1. Ujeedada gaarka ah:

***Marka ay bartaan qaybtan cutubka ka midka ah, ardaydu waxay awoodi doonaan:***

- *Inay baadhaan saameynta uu cudurka Ej-Ay-Fi/Aydhiska–ku uu ku leeyahaydhaqaalo bulsheedka*

## 2. Tusmada

- Faafidda cudurka Ej-Ay-Fi/Aydhiska-ka
- Saameynta cudurka Ej-Ay-Fi/Aydhiska -ka.

## 3. Araarta

Dunida aynu ku noolnahay waxaa ku soo fool eh dhibaatooyin badan, kuwaas oo noqday arrimo dadweynaha u dhexeeya ama mawduuc Hadaba mawduucyadan ayaa ah kuwo si aad ah loogadaneeyo wadan ahaan iyo caalami ahaanba, sidaas ayaana talaabooyin lagu joojiyo loo hirgalin karaa ama samayn karaa.

Mid kamid ah mawduucyadaas ayaa waxuu yahay faaiidda iyo saameynta cudurka Ej-Ay-Fi/Aydhiska-ka ayaa ah mid kamid ah dilaayada ugudaran ee qanigii labaatanaad. Waxuu dilaa aadamaha isaga oo aan eegaynin midabka, diinta iyo meeli halka ay dhacdo ama goobta. Waxyeeladiisu waxay ugu sii daran tahay Afrika, siiba Afrikada ka hoosaysa saxaaraha. Ku dhawaad 70% oo dadka qaba Ej-Ay-Fi/Aydhiska ka ah ayaa waxay kunool yihiin Afrikada ka hoosaysa (koonfurta ka xigta) saxaraha. Qaar kamid ah qodobada ka qayb qaatay xaaladan aadka u daran ayaa waxay yihiin isdhexsocodka aadka usareeye eedadaka danayn la'aanta dawladaha, heerka waxbarasho ee dadka uhoo seeya siiba dumarka, iwm.

Waxaa barayaasha lagu latalina yaa in ay soo aruuriyaan macluumaad oo ay kasoo akhriyaan jaraa idayada buugaagta iyo waxkastoo ka caawin aya in ay cashirka kadhigaan mid soo jiidasholeh oo xiisa galiya ardayda.

# 4. Hababka baris barasho

## 4.1 Adeegsiga kaabayaasha wax-barisa

- Buugaag yar yar oo aan aalaa jaldi lahayn (jaraa ido)
- Warbixinada xarumaha caafimaad.
- Ku martiqaadid marti ka socota xarumaha caafimaad iyo xafiiska ka hortaga iyo xakamaynta Ej-Ay-Fi/Aydhiska ka.

## 4.2 Adeegsiga Hababka barista.

- Sharaxaad
- Dood
- Su'aalo waydiin
- Dulmarid

## 4.3 Cashir diyaarinta horteed

- Baraw ka soo aruurso macluumaadka la xidhiidha xafiisyada ay khusayso iyo goobaha warbaahinada.
- Isku habayso warbixinada si uu soo jiidasho ugu yeesho ardayda.

## 4.4 Soo jeedinta cashirka

**b. Hordhaca cashirka**

Baraw arday sii kolka hore fursad ay kusoo bandhigaan fikradooda iyo waxay garan ayaan inta aadan bilaabin cashirka.

**t. Nuxurka cashirka.**

- Sii wad hordhaca adigoo fursada ugu waya ama balaaran siinaya kawada doodida.
- Arday kasta inta ay la tahay in uu heerka faafidda uu gaadhay ha kusoo bandhigo khariirada sida buufinta camal ah (oo kale ah).




Ardaydu ha sawiraan khariirada sare oo kale, kadibna ha aqoonsadaan tirada dadka qaba cudurka Ej-Ay-Fi/Aydhiska-ka ee xaafadaha kala duwan ee degmadooda.

U fur dood–dhexdooda ah ardayda oo ku saabsan int irada dadka u dhinta cudurkan ay yaraanayso (hoo-usiidhacayso) iyo in ay tahay sidii ay sanado kahor ahayd.

Baraw adigoo hogaaminaya ama hagaya ardaydu hake samayso urur samafal, kaasoo ay iska;aruuriyaan dhexdooda shumaan yar (Lacag yar).

Shaqo-kooxeed U ogolow inay ardaydu isu diyaariyaan hasoodiyaariyaan shaxdan (jadwal) mid kan soo socda oo kale ah. Ha ku buuxiyaan tirada saxda ah ee ay soo arkeen. Jawaabta ay helaan ayaa waxay siin doontaa sawir ama muuqaal wanaagsan oo ku saabsan korarka dadka iyo isu dheelitirnaan la’aanta.

| | Cabbirka | Saamiga | Qiimeynta | | |
|---|---|---|---|---|---|
| | | | Yaraan | Mayara | aad u wanaagssan |
| 1 | Saamiga ardayda fasalka | | | | |
| 2 | Saamiga ardayda iyo kuraasta | | | | |
| 3 | Saamiga ardayda musqulaha | | | | |
| 4 | Saamiga ardayda buugaagta | | | | |
| 5 | Saamiga ardayga-lay bareeriga | | | | |

## 4.5 Qiimeynta iyo dabagalka la socodka

**B. Qiimayn**

- Su'aalo waydiin
- Hawlgalo ay ku soo qorayaan warbixino kooban udirid

**T. Dabagalka la socodka**

- Diiwaan galii kartida xirfadeed ee la filayo
- Aqoonso heerka karti ama xirfadeed ee lafilayay inta laga suuragaliyey.
- Si kooban dib naqtiin ugu samee cashirka.

## 4.1.2Natiijooyinka dhakhsa u korka Dadwaynaha (dadka)

## 1. Ujeedada gaarka ah

Marka ay bartaan cashirkan, ardaydu waxay awoodi doonaan inay:

- Aqoonsadaan waxyaabaha waaweyn ee uu keeno dhakhsa u korka dadka Afrika.
- Inay caddeeyaan ama qeexaan hababka suuragaliin aya in ay bulshadu aqoonsato saameynta uu leeya hay dhakhasa ukorarka dadka Afrika.

## 2. Tusmooyinka

- Dheelitir la’aanta udhexaysa khayraadka iyo
- Shaqo la’aanta.
- Sabooldnimada

## 3. Araar

Sida ku xusan buuga ardayga dhakhsa u korka dadka ayaa noqday mid kamid ah mawduucyada bulshada iyadoo ayna jirin wax kala duwanaansha fikir ama aragti ah dhanka korarka dadka.

Afrika iyo wadamada kale ee soo koray ayaa ah meelaha ay jawaab xumada ama natiijada saameyneed ee dhakhsa u kororka dadku keeno ay ugu darantahay.

Natiijooyinkan kuwa ugu waaweyn waxaa kamid ah:

- Isudheelitir la’aan u dhexaysa korarka dadka iyo khayraa dka
- Shaqo la’aanta iyo
- Sabool nimada.

Baruhu waxuu soo qaadan karaa tusaalayaal agargaarkooda ah sida dhulbeeredka la’aanta ama yaraanta, ka jirta dhanka geedaha lashito ama xaabada, tirada sii kordhaysa ee dhaliinayarada shaqo la’aanta ah iwm. Ardayduna way la kulmi karaan dhibaatooyin kuwan aan soo sheegnay la mid ah dood ahaan way u soo bandhigi karaan.

## 4.1 Hababka baris barasho

## 4.1 Adeegsiga kaabayaasha wax-baris

- Buuga ardayga
- Sawiro

## 4.2 Adeegsisga hababka wax-barista

- Sharaxaad
- Dood ama kawada hadlid
- Su’aalo

## 4.3 Cashir diyaarinta horteed

- Baraw diyaar garayso sawiro iyo muuqaalo la xidhiidha
- Sidii ay ardaydu si wanaagsan uga qayb qaadan lahaayeen oo aad usii diyaargarwdid.

## 4.4 Soo bndhigdda cashirka

**B. Hordhaca cashirka**

Baraw intaadan bilaabin cashirka, fursado sii ardayda ay ku soo bandhigaan afkaartooda ku aadan korarka dadka iyo dhibaatooyinka uu sababo.

**T. Nuxurka cashirka**

- Sharax qodobada keena dhakhsa ukorarka dadka
- Sii ardayda tirada (baaxada) dadka itoobiya oo ah xiliyo ama wakhtiyo kala duwan waydii shaksiyaal kamid ah ardayda tirada guud ee qoyskood u ka kooban yahay, kadibna dood ahaan u sooban dhig.

## 4.5 Qiimaynta iyo dabagalka

**B. Qiimayn**

Waydii su'aalahan

- Maxay noqon kartaa waxa sababay dhakhsa ukorarka dadka?
- Maxay yihiin natiijooyinka ay keento?
- Natiijadee ayaa aad uga jirta agagaarkiina?

**T. Dabagalka la socodka**

- Baraw u dir ardayda hawlgalo ay ku soo indha indheeyaan agagaarkooda
- Waxaad siisaa farsan ay kaga talo bixiyaan waxay soo arkeen ee aad u dirtay (howlgal ahaan ugu jirtay).
- Usheeg in ay isticmaalaan khariirad muujinaysa sababaha iyo saameynta dhakhsa ukorarka dadka.

# 4.2 Arrimaha Xuquuqda iyo Badbaadada

## 1. Ujeedada gaarka ah

***Marka uu dhamaado cashirkan ardaydu waxay awoodi doonaan:***

- *Inay qeexaan waxa macnaha erayga xuquuq ay tahay*
- *Inay caddeeyaan ama qeexaan xeerka caalamiga ah ee UN-ta ee ku saabsan xuquuqda caruurta waxa uu ka koobanyahay.*
- *Inay tilmaamaan gabood-fallada xuquuqda caruurta ee ka dhaca goobaha ay dagan yihiin.*
- *Inay caddeeyaan iyo difaacaan gaboodfalada xquuqda caruurta.*
- *Inay ka bixiyaan tusaalayaal iyo inay caddeeyaan sababaha ayna uga jir maamul-suuban Afrika.*
- *Inay qoraan warbin gaaban oo tusaale ah maamulka- suuban (maamul – wanaaga) iyo mamula-xumada ka jirta dagaamadooda.*

## 2. Tusmooyinka

- Macnaha arayga xuquuq
- Arrimaha xuquuqda
- La dagaalanka ku gabood falka xuquuqda caruurta
- Nuxurka ama gunta xuquuqaha aadamaha iyo dimuqraadiga.
- Maamul-suuban La’aanta Afrika.

## 3. Araar

Xuquuquhu waa aasaaska ahaanshaha bani’aadam wanaagsan. Sababtu waxay tahay qofna ma noolaan karo isagoo aanan shaciga iyo bulshadu dhawraynin ama ilaalinaynin xuquuqdiisa.

Xuquuquhu waxay ka koobanyihiin xuquuqaha aadamaha iyo dimuqraadiyada, xuquuqda caruurta, xuquuqda dumarka, xuquuqda qaran iyo ta qawmiyadaha iyo xuquuqda dadka dhiman (naafada ah.)

Waxaa xaquuqda caruurta ee Itoobiya lagu xaqiijiyey ama lagu caddeeyay Dastuurka JDFI (Jamhuuriyad Dimoqraadiga Federaalka Itoobiya) qodobkiisa

36 aad xaquuqda dumarka qodobka 35 aad; mida qaranka iyo qocomiyadahana qodobka 39 laad.

Waxaa macalinka lagula talinayaa inuu ardayda isku habeeyo isagoo eegaya heerka fahanka ardayda ee aan iskumidka ahayn. Waxaa cashirkan lagu wanaajin karaa iyadoo ardaydu dood dhexdooda ah iskuwaydaarsadaan afkaartooda iyo aragtiya dooda kaladuwan.

## 4. Hababka baris Barasho

**B. Adeegsiga Kaabayaasha wax-barista**

- Dastuurka JDFI
- Khariirad siyaasadeed muujinysa kala qaybsanaanta siyaasadeed ee khariirada JDFI

**T. Adeegsiga hababka barista**

- Ka doodid ama kawada hadal
- Dood
- Sharaxaad iyo muuqaal ku muujin.

**J. Cashir diyaarinta ka hor**

- Diyaarso Dastuutka JDFI
- Diyaa rgarayso khariirado kala tilmaamaya xiliyadii kala duwanaa ee ay soo maratay Itoobiya, Laga soobilaabo xiliyadii boqortooyada ilaa iyo hadda oo ay federaali tahay.
- Diyaarso Dastuurada xiliyada kala duwan la dajiyey ee Itoobiya.
- Ardayda koox koox isugu habee.

**X. Soo bandhigida cashirka**

**B. Hordhaca cashirka.**

Waydii ardayda su’aalahan soosocda:

- Maxaad ka taqaanaan xuquuqaha
- Taxa dhamaan xuquuqaha ku xusan Dastuurka federaaliga ah ee Itoobiya?
- Ma idinla tahay in ay xuquuquhu leeyihiin xadama xada.

## T. Nuxurka cashirka

- Qeex erayga xuquuq
- Sharax qodobka ku xusan Dastuurka ee difaaca xuquuqda caruurta, xuquuqda dumarka iyo xuquuqaha aadama ha iyo dimuqraadiyada.
- Sharax xidhiidhka u dhexeeya Dastuurka JDFI iyo kan caalamiya ah.

## J. Dulmarid ama Naqtiimada cashirka

Baraw waxaa lagula talinayaa in aad xooga saartid qodobadan soo socda.

- Xuquuqdu waa dalabka ama waxa ay ku andacoodaan shakhsiyaadku.
- Waa in ay aqoonsi ka hesho bulshada.
- Waa in ay aqoonsi sharcina hesho ama lasiiyo.

Xuquuqahu waa lagama maarmaan waana aasaaska nolosha, sababta oo ah

- Waxay damaanad qaadaa aadaminimada. Xuquuqda aadamahu
- Waxay tiir u tahay xuquuqda dimuqraadiyada

Xaquuqaha gundhiga ama asaaska ah ee go’aamiya wanaagsanaanteena sifiican ahaanteeda waa:

Xuquuqda in aan noolaano, xuquuqda xoriyadeed iyo xuquuqda lahaansho.

## Kh. Qiimaynta iyo dabagalka la socodka

## B. Qiimaynta

Baraw waydii ardada su’aalahan soosocda oo kale:

- Muxuu yahay xidhiidhka ka dhexee yay xuquuqaha iyo waajibaadyada?
- Maxay noqon natiijada
- Rabitaanka dadka ee ay codsanayaan xoogana saarayaan xuquuqaha oo kaliya.
- Dawlada dadka ku cadaadisa in ay gutaan waajibaadkooda iyada oo aan dhawraynin xuquuqdooda?
- Dastuurka xadida xuquuqda dadka

**T. Dabagalka la socodka**

- Usheeg ardayda in ay soo akhriyaan dastuurka federaalka ee Itoobiya iyo in ay isbarbar dhig ku sameeyaan xuquuqda aadamaha iyo xuquuqda dimuqraadiga.
- Ardaydu ha ku soo qoraan warbixin dhaqama lagu waxyeeleeyo ama lagu xadgudbo xaquuqda caruurta ee dagaankoda.

# 4.3 Barnaamijka Iskaashiga

**Xusadaha 4**

***Markii uu casharkani dhamaado kadib ardaydu waxay awoodi doonaan unay:-***

- *Magacaabaan ururo goboleedyada Afrika*
- *Tilmaamaan dalalka ka tirsan urur goboleed yadan*
- *Garwaagsadaan Bartilmaameeddasa bah- wadaagnimo ee urur goboleed yadan.*
- *Isla falanqeeyaan samaysankii OAU iyo isu bedelkiisii AU.*

## 2. Tusmooyinka

- Urur goboleedyada ugu w/wayn
- Helitaankii OAU iyo isu bedelkii AU
- Hadafyada ay hiigsanayaan ee ugu muhiimsan ururada

## 3. Araar

Waxaajira laba nooc oo ururo caalami ah iyo kuwo goboleed ururada caalamiga ah waxaa aasaasay laba iyo inka badan oo dawlado madaxbannaan ah. Waxaa ka duwan urur goboleedyada oo leh ujeeddo guud. Ururada gobol ahaaneed ujeedadooda waxaa xadida xaaladaha iyo duruufahoodagobol.urur goboleedyada waxaa sameeya dalalka ka tirsan gobolka.

Ururada caalamiga ah iyo ururada goboleed labaduba waxay leeyihiin ujeeddo guud sida:-

- Adkaynta Nabada iyo Amniga dunida

- Kouqaadida xiriirka saaxubtinimo ee ka dhexeeya dalalka ku guulaysiga iskaashiga caalaminga
- Xalinta dhibaatooyinka dhaqaale, bulsho, dhaqan ama dabeecado Aadmunimo

## 4. Habka Baris – Barashada

### 4.1. Qalabka kaabayaasha

- Axdigii UN, OAU iyo AU
- Qodobada urur goboleedyada sida: COMESA, ECOWAS,SADC, AU, NBI, IGAD

### 4.2. Hababka dhigista

- Falanqayn
- Muujin
- Khariirad

### 4.3. Cashardiyaarinta ka hor

- Soo ururso tixraacyo Raadi Atlaska
- Isku habee Arday lamaane iyo kooxba

### X. Soo bandhigida casharka

## B. Hordhaca Casharka.

Weydii ardayda inay ku tusaan halka ay ku taallo xarunta xarumaha ama saldhigyada urur goboleedyada. Khariidada aad gacanta ku hayso.

Qaramada midoobay, midowga Afrika COMESA, SADC, IGAD, ururka ismaamulada marayknka, suuqa dhaqaalaha yurub iyo jaamacda carabta.

## T. Nuxurka Casharka

Cadee ujeeddooyinka aasaasiga ah ee urur goboleedyada. Isla falanqrrya ururadan dhinacyadooda adag iyo jilicsan isla falanqeeya baahida keentay su bedlkii OAU isu bedes hay AU.

Isla falanqeeya doorka uu Golaha Amaanka ee Q.M iyo dibu habaynta la doonayo in lagu sameeyo wakhtigan xaadirka.

## 4.4.Soo koobida casharka

Xusuusi kuwan soosocda:

Ururada caalamiiga ahi waxa ay leeyihiin ujeeddooyin gund. Laakiin ururada goboleed iyeeddadoodu waa mid xadaysan Urur goboleedyadu waxay leeyihiin ujeedooyin kala duwan. Arimo milatari, Dhaqaale ama ujeedooyin siyaasadeed midkood. Tusaale:- NATO waa ujeeddo milatari Beesha Dhaqaalaha ee reer yurub waa ujeeddo Dhaqaale, Midowga Afrika Ujeeddo siyaasadeed iyo Dhaqaale, ECOWAS oo ah ujeeddo dhaqaale.

**Cashir Qorsjayn**

Tusaal yar oo Kooban

Magaaca Baraha: __________________ Magaca Dugsiga:_______Fasalka 7[aad]

Taariikhda: __________________ Maadada: C/Bulshada

Cinwaanka: Afrika halka ay dhacdo xariiqo iyo derisahaan.

**Xiisadaha loo qoondeeyay : 45**

**Ujeedada gaarka ah**: Markii uu casharkani dhamaado kadib ardaydu waxay awoodi doonaaninay:-

1. Fahmaan fikrada halka ay deris ahaan iyo xariiqo (dhigo iyo lolo) ahaan dhacaan.
2. Fahmaan halka ay dhacdo Afrika deris ahaan
3. Fahmaan halka ay dhacdo Afrika xariiqo (dhigo iyo loolal) ahaan.

| **Faah faahinta Tusmada** | **Waxqabadka Baraha** | **Hawlgalka Ardayga** | **Kaabeyaas ha barista** | **Faallo** |
|---|---|---|---|---|
| • Fikrad aha xariiqo iyo Deris ahaan<br>• Halka ay dhacdo Afrika Deris ahaan. | • Faahfaahinta fikradahaas Afrika halka aydhacdo<br>• Kuqaadasha dafasalka | • U ogolow inay ardaydu sharaxaan halka ay fadhiyaan cida dhinacyada ka | • Khariirada gidaarka lashdho<br>• Galoob<br>• Atlas | • Fadhigaar dayda ee fasalka dibadiisu waa mid ku |

| | | | | |
|---|---|---|---|---|
| • Halka ay dhacdo (dhigo iyo loolal) ahaah | dibadiisa<br>• Kucalaamadi in ardayga 'X' weydii yaa kaxiga midig, yaa kaa xiga | • Kala xigta u dir in kuwa ugu wada guulaysta adiga | | xidhnayd dugsiga |

## 4.5 Qiimaynta iyo la socodka

**B. Qiimaynta**

Ku dhiiri geli Ardayda inay falanqeeyaan qodobadan soo socda:

- Aqoonsiga xubnaha ka tirsan Qaramada Midoobay iyo sinnaan shaha xubnaha ka tirsan ee dhinacyada hab-dhaqanka iyo Aragtiyada
- Golbaha Amaanka iyo Awoodadiid mada qayaxan ee ay leeyihiin.
- Awooda baahsan ee ka dhaxaysa Golaha loo dhan yahay iyo Golha Amaanka
- Sababta ugu wacan ee gudiga Amaanada ay haatan U.N tu uga yaraysay hawlahoo dii

**T. La socodka**

- U diir ardayda inay shaqo guri u qaataan iyaga oo is barbardhigaya awoodaha golaha loo dhan yahay iyo golaha Amaanka.
- Weydii ardaydu inay qoraan (taxaan) dhinacyadiisii adkaa iyo dhinecyadiisii jilicsanaa ee OAU da.
- Weydii inay warbixin ka qoraan wakhtigan xaadirka ah waxyaabihii ugu muhiimsanaa ee uu u soo kordhiyay gobolka ururka ECOWAS.

# Layliga Guud Jawaabihiisii

## I. Run – Been

1. Run 2. Been 3. Run 4. Run 5. Run

## II. Buuxi meelaha Bannaan

1. 70% 2. Jamuuriyada koonfurta Afrika
3. Waajibaadyo 4. mid shaqsiyeed ama qof ahaaneed
5. ECOWAS, COMESA, SADC iyo IGAD.

## III Jawaabo gaagaaban.

1. Jawaabtu waa mid kuxiran 2. Jawaabtuwaa mid ku xiran dagaanka
3. COMESA
4. as ka ganacsiga suuqa madow ee caruurta ee meelaha aan la aqoonin

   b. Dhedigu, waa kuwa sida gaar ahaaneed dhibanayaasha u ah xaga galmada qasabka ah iyo gudniinka fircooninga.
5. Dawlada keli talisku iyada laftigeeda ayaa isdoorata.

Meesha xukuumada Dimoqraadiyadeed ay shacabku soo doortaan

## IV. Waxqabad Ficil ku muujin

Daraasaad ka hadlaya saameynta dhaqaale iyo mida bulsho ee uu cudarka Ej-Ay-Fi. Ay dhisku u horseedo qoyska uu ka mid ka yahay dhibane uu haleelay cuduurkan.

## V. Ka dooro

1. d. Aqoonsiga sare ee haweenka 2. b. 15 – 24

## Tixraacyada

**Buuggaagta**

1. Encarta premium 2009
2. Woobeshet shibeeshi (2002. E.C) “Madbacada ileeni ee Atlaska cusub”

# Cutubka 1aad: Ku noolanshaha Afrika Waa=> 23, xisadood

## Maxsuulka Cutubka: Ardaydu waxay awoodi doonaan:

- Inay sharaxaan qaabka, goobta, iyo qoysaska luqadda sare ee Afrika.
- Inay aqoonsadaan ilbaxnimadii hore iyo horraantii qarano gumeysiga Afrika.
- Inay ka doodaan qodobada saameeya baahidda, degaameynta iyo nolosha Afrika.

| Kartida | Tusmayaasha | Waxqabadka Lafilayo |
|---|---|---|
| ▪ Ardaydu waxaay awoodi doonaan;<br>▪ Inay isbarbardhigaan baaxadda iyo qaaradaha kale.<br>▪ Inay aqoonsadaan meesha saxda ah ee ay dhacda qaaradda Afrika.<br>▪ Inay sharaxaan ereyada loolka iyo dhigta ee xidhiidhka barbaro la'ah diilimaha ( meridians )<br>▪ Inay magacaabaan qoysaska luuqadda sare ee Afrika .<br>▪ Inay muujiyaan meeshey ku yaaliin masaarida iyo kaartajka oo xudun u ahaa ilbaxnimooyinkii hore ee Afrika. | 1. Ku nolaanshaha Afrika.<br>1.1. Baaxadda dadka Afrika, qaabka iyo meeshay dhacdo Afrika, Waa => 2, xiso.<br>▪ Booska Afrika.<br>1.2. Loolka iyo dhigta, waa => 3, xisadood.<br>▪ Kulaalayaasha kandarka, kaabrikoonka iyo dhul-badhaha.<br>▪ Xariiqyada loolka iyo dhigaha iyo liidinta giriinwijka.<br>▪ Waqti socodka.<br>1.3. Qeysaska luqadda sare iyo baahsanidooda Waa=> 2, xisadood.<br>▪ Qoysaska luqadaha waa weyn.<br>1.4. Ilbaxnimadii hore ee Afrika (Egypt iyo carthage) Waa =>2, xisadood. | ▪ Waxaad cashirka ku billawdaa soo gudbin kharidad duleedda Afrika iyo inaad ku dhiriigaliso ardayda inay ka keenaan warbixin kala duwan oo ku saabsan waxay ku arkeen khariidada Afrika. Ardaydu haka doodo wax ku saabsan baaxadda, qaabka iyo meeshey ku talo Afrika, iyagoon ku saleynaya xogta ay kala soo dhex baxeen khariidada. Ardayda hala siiyo khariidad madhan oo Afrika ah iyo wadamadeeda, taasoo ah in sidoo kale buugagtoodana ay ku jirto, iyo in wax laga weydiiyo ardayda si ay wax uga sheegaan wadamada Afrika. Baruhu waa inuu wax ku daraa dheeri ah xog-waran kooda. => Ardayduna waa inay ku dartaa magacayada wadamada, caasimadaha iyo wabiyada waa weyn khariidadooda. |

| | | |
|---|---|---|
| ▪ Inay sharaxaan faa'iidadii ay lahaayeen masaaridii hore kaartagka ee xagga ilbaxnimada.<br>▪ Inay baadhaan gumeysiga hortii dhaqaalihii asaaska u ahaa qaramadii maali iyo fuuji.<br>▪ Inay muujiyaan fahamka aqoon cilmiyeedkii ay ka gaadheen xagga dhismaha gumeysiga hortii magaalo qaramadii sinbaawi.<br>▪ Inay fahmaan baahsanida ganacsiga masaafada dheer ee Itoobiya si uu isugu xidho dadka.<br>▪ Inay aqoonsadaan ganacsiyada wareega ee Afrikada kale.<br>▪ Iyo inay aqoonsadaan asaladoodii.<br>▪ Inay tilmaamaan qodobada saameeya baahsanida dadka.<br>▪ Inay la'xidhiidhiyaan qodobadan | ▪ Ilbaxnimadii hore ee masaarida, xagga; Ahraamta, Taalooyinka, dadka, beeraha, ganacsiga iyo heeroglaafiyadda.<br>▪ Ilbaxnimadii hore ee carthage.<br>1.5. Magaalo qaramooyinkii gumeysiga hortiisa ahaa sida: simbaawi, maali, fuunji Waa=> 3, xisadood.<br>▪ Simbaawi gumeysiga ka hor.<br>▪ Maali gumeysiga ka hor.<br>▪ Fuunji gumeysiga ka hor.<br>1.6. Ganacsiga masaafada dheer waa qodob isku xidha dadka.<br>▪ Ethiopia, Waa=> 3, xisadood.<br>▪ Ganacsiga masaafada dheer ee Itoobiya.<br>1.7. Dadweynaha.<br>1.7.1. Baahsanida dadka iyo dagaankeeynta Waa=> 3, xisadood.<br>▪ Qodobada furaha au ah baahsanida (filiqsanida) dadka iyo dagaameynta. ( Dhirta, cimilada , cadaadiska dadka) | Cashir barasho: Waa in la'isbarbardhigo labo caasimadooda: Sida; Akra iyo kaambala. => Kadis isku aadin ahna laga sameeyo caasimado iyo wadamo. Doodada fasalka: Waa dib u eegidda shaqaddii arday ee xagga fasalkii 6aad ee ku saabsaneyd cinwaanada kaabrikoonka iyo kansarka, dhulbadhaha iyo udub-dhexaadka dhulka. Ugu sawir ardayda sabuuradda dusheeda. Marka xiga waxaad hordhac ka sameysaa xariiqyada kale ee loolasha ah. Kadibna, sharax ku soo jeedi xariiqyada dhigaha, adigoo ku bilaabaya xariiqa meridiyomka.<br>▪ Weydii ardayda haddii mid kasta uu yaqaano sababta ay u noqdeen muhiim. Waa inaad sharaxdaa xariiqahaas.<br>▪ Ardaydu waa inay kuguuriso buugagteeda shaxanka. Ugudambeyna, waxaad sharaxdaa hal saacad oo bariga ah, marka laga tago dhigta xagga bariga ah 15-digrii waxaad la'xidhiidhisaa marinka cadceedda. => Adeegso jadwalka telefishinka dayax gacmeedda. Sida; Nilesat oo muujinaya waqtiga ingiriiska (UK), Qaahira, Addis-Ababa, Sucuudi carabiya, Abandabay i.w.m si looga daawado ciyaaraha |

| | | |
|---|---|---|
| dagaameynta dadka Afrika iyo inay ka aqoonsadaan khariidada dusheeda.<br>▪ Inay sharaxaan noocyada habnololeedka caanka ah ee laga helo Afrika.<br>▪ Inay laxidhiidhiyaan kuwaan xagga cimilada iyo dhirta.<br>▪ Waddooyinka gaadiidka.<br>▪ Inay ka doodaan sababaha magaalada dagaankeeda.<br>▪ Inay aqoonsadaan tusaalooyin.<br>▪ Inay u feejignaadaan furaha waddooyinka gaadiidka iyo saameynta amaanli'iida shacabka | ▪ Cimilada: Dhullka hoose ee dhul-badhaha, safaanaha, dhulka sare ee dhulbadhaha, lamodagaanka.<br>1.7.2. Habka nolosha Afrika, Waa=> 3, xisadood.<br>▪ Kalluumeysiga Ethiopia ee dooxada Rifti.<br>▪ Dhul-hoosaadka dhulbadhaha iyo kharyaadkiisa: Naayjeeriya saliida, geed-qunbaha, kaluumeysiga , midhaha la'cuno, sida; kasaafaha .<br>▪ Safaanaha sare: Lo'dhaqashada (Ethiopia iyo Kenya).<br>▪ Dhulka sare ee dhulbadhaha: wax soo saarka midhaha, bunka, iyo wax soo saarka caleenta shaaha, Ubaxa, bixidda qudaarta, wax soo saarka caanaha i.w.m.<br>1.7.3. Qodobada saameynta ku leh baahsanida, dagaameynta, iyo hab nololeedka. Waa => 2, xisad.<br>▪ Sababaha | kubadda cagta.=> Weydii ardayda waqtiga ay ciyaarta ka bilaabaneyso Addiss-Ababa. Haddii waxqiga UK ee xariiqa eber digrii uu yahay, 14, saacadood.<br>▪ Weydii ardayda haddii ay magacaabi karaan qooysaska leh luqadda sare iyo inay ku daraan khariidada madhan ee sabuuradda ku dultaala. Tusaale: Luqooyinka baantuuga, luuqadda carabiga (sam language).<br>▪ Waxaad bixisaa sharax kooban oon ka badneyn shan daqiiqo, oo ku saabsan luqadaha sare ama cajiibka ah .<br>▪ Cashir barashada isku barbardhig dadka labada luqadood ku hadla ee kooxaha waa weyn.<br>▪ Hadaba weydii ardayda inay dhammeystiraan khariidada muujinaysa baahsanaantooda. Ugudambeyna weydii ardayda koox ahaan si ay kuugu shegaan hadaba sida suurogalka ah ee ku saabsan kuwa ku hadla hal luqad kooxeed gaar ah.<br>▪ Kadooda adiga iyo ardaydaada meeshey dhici jirtay masaaridii hore, kuna sameeya khariidada sabuuradda dusheeda. Waxaad barbar dhigtaa masaarida casriga ah |

| | | |
|---|---|---|
| | dagaameynta magaalooyinka iyo tusaalooyinka ( Addis iyo Mombaasa).<br>▪ Waddooyinka gaadiidka iyo arrimaha ammaanka sida: Dagaalada iyo rabshooyinka | ee manta. Kuna samee khariidada.<br>▪ Waxaad ku soo qaadataa cashirka waxyaabihii ay dhisidda, boqorada faraacinada, cilmiga beeraha iyo isgaadhsiinta, waxaad barbar dhigtaa taalada Axum (aksum), farta Heeroglaafiga: Ardayda waxaad ka sii saa fure ka mid ah summadaha asaaska ah iyo inaad weydiiso ardayda inay akhriyaan qeybaha fudud ee farta heeroglaafiga ah, kana dood waxtarka ay u leedahay xagga isgaadhsiinta.<br>▪ Weydii ardayda inay khariidada ku daraan kaartejka (carthage), waxaad cashirka ku soo qaadataa hubin xagga cilmiga beeraha ay ka gaadheen, dadka iyo isgaadhsiinta. => Samee isbarbardhigu u dhexeeya Carthage iyo Egypt.=> Dood ka samee faa'iidada weyn ee ilbaxnimada manta jirta. => Ardaydu waa inay naqtiin ku sameyso waxay ka soo barteen ilbaxnimooyinkii hore iyo luuqadahoodii.=> Caddee, magaalo-qaranimadii sanbaawi gumeysiga hortii, idinkoo khariidad ku muujinaya, kadood sii waxay ka barteen. => Si kooban u eeg simbaawi gumeysiga |

| | | |
|---|---|---|
| | | hortii. Hadda, waxaad hordhac u sameysaa Maali iyo Fuunji waxaadna weydiisa ardaydana inay sheegaan meesha ay dhacdo khariidadooda .=> Ardaydu waa inay u fiirsato Maali iyo Fuunji kuwaas oo lahaa aqoon xagga dhismaha, dadka, beeraha, gundhig dhaqaale iyo ahmiyad kaleba.=> Koox ahaan hamuujiyeen xiisaha xagga dhaqankooda ah, lana qoreen .=> Waxaad sameysaa kadis degdeg ah oo ku saabsan magaalo qaramadii gumeysiga hortii jiray.<br>▪ Ardaydu haka doodo, iyadoo sameyneysa khariidad lagu; muujinayo wadooyinka ganacsi ee Itoobiya . Marka xiga waa inay aqoosnadaan iyo inay caalmadiyaanw waxyaabaha ugu waa weyn ee ay qaadan jireen iyo waddooyinka ay ku safri jireen.=> Ardaydu waa inay ka doodo waxtarka ganacsiga iyo siduu ugu baahsan yahay isku xidhka dadka Itoobiya .=> Kadood waddooyinka ganacsi ee ka baxsan Itoobiya iyo meeshuu socodkoodu ku dhamaado.=> Cashir barasho ku samee waddooyin labo ganacsi oo kala ah, iyo sababta, xaga taariikhda iyo casri ahaanba. |

| | | |
|---|---|---|
| | | ▪ Ardaydu haka doodo khariidad duleed muujinaysa dhirta Afrika.=> Weydii ardayda waxay ka sheegi karaan cimilada iyagoon ka eegaya xagga khariidada .<br>▪ Kadood, meesha ugu carosan ee ku habboon dhul-beereed.<br>▪ Cashirka ku soo qaado xaaladaha cimilada.=> Ardaydu ha’fiiriyeen khariidada dagaameynta dadka Afrika, waana inay la’xidhiidhiyaan qodobada cimilada ay mar hore ka soo hadleen.=> Kadood qodobada kale ee ku saabsan isu socodka dadka sida; Dagaalada iyo Abaarta.<br>▪ U qoondee ardayda inay aqoonsadaan hab nololeedka ugu muhiimsan qeybaha dagaameynta, kala duwan iyo inay la’xidhiidhiyaan hab nololeedka qodobada kala ah cimilada iyo khayraadka. Layliga cashirka waa hawlaha reermiyiga (dhulalka hoose ee dhulbadhaha). Ku soo qaado cashirka lo’dhaqashada.=> Kadood furaha wada/xadiidka ee Afrika, ku calaamadi waddooyinka khariidada dusheeda, iyo inay ka doodaan saameynaha dagaalada iyo rabshooyinka waddooyinka gaadiidka dhaca.<br>▪ Ardaydu inay fiiriyaan |

| | | |
|---|---|---|
| | | khariidada iyo inay naftooda xusuusiyaan goobta dagaanada magaalada.<br>▪ Waxaad soo qaadataa Addis-Ababa iyo Mambaasa.<br>▪ Xoogga saar in Addis-Ababa laga helo dooxo hooy u ah caro-sanka iyo wabiyo, Mambaasana ay tahay guriga dakadda wax dhaafinta iyo wax soo dajinta iyo inu kabillabmo waddo tareen oo bariga Afrika. Farqiga iska soo horjeeda shaqaalaha Addis-Ababa oo ka hawl gala xidhiidhida bunka iyo midka mambaasa oo ka shaqeeya furdada.<br>▪ U tilmaan in uu xidhiidh uu ka dhaxeeyo xagga cimilada ah.<br>▪ Dood ka samee saameynta ama raadadka ay leeyihiin dagaalada iyo qalalaasooyinka ku dhaca dhaqdhaqaaqa dadka iyo gaadiidkaba. |

# Qiimeynta:

**1**. Baruhu waa inuu qiimeyn joogto ah ku sameeyo shaqada ardayda inta uu socdo cutubkan waana inuu ibarbar dhigo sharaxa socda, isagoo ku saleynayo kartida, si uu go'aan uga gaadho inay gaadheen heerki waxbarasho ee looga baahnaa iyo in kale

## 2. Ardayda gaadhay heerkii shaqo ee looga baahnaa:

Waxay awoodi doonaan: Inay isbarbar dhigaan baaxadda iyo qaabka Afrika qaaradaha kale.=> Inay magacaabaan dadka leh luuqadaha cajiibka ah ee Afrika qaaradaha kale.=> Muujiyaana meeshay dhacaan masaaridii hore iyo carthage-ka oo ay ahaayeen xuduntii ilbaxnimadii Afrika, oo ay tusaan fahamkooda in Afrika ay tahay guriga qooysas jinsiyo badan leh, oo ay sharaxaan ilbaxnimadii hore ee masaarida iyo carthage-ka, ooy baadhaan dhaqaalihii daganaa ee magaalo-qaranimadii Zimbaawi, Maali iyo Fuunj, gumeysiga hrotiidsii, inay fahmaan ka qeybqaadashada ganacsiga masaafada dheer ee Itoobiya oo iskuxidha dadka.=> Ardaydu waa inay sidoo kale awoodaan inay muujiyaan fahamka guulihii ay ka gaadheen magaalo-qaranimadi xaga cilmiga handasada ama dhismaha reer-simbaawi gumeysiga hortii iyo inay dood muhiim ah ka sameeyaan qodobada saameeya filiqsanida ama isbaahinta dadka iyo habnololeedkooda.

## 3. Ardayda ka sarreysa Heerkii Looga Baahnaa;

Ardayda heerka sare ka gaadhay dhanka shaqadooda waa in lagu qiimeeyo, loona aqoonsado himilada fiican ee ay ka gaadheen hawlihii waxbarashadooda. Waa in lasii dhiirigaliyo sii wadida shaqo adeyga iyo in ayna isdhiganin si ayna uga hoos marin heerka fiican ee ay gaadheen.

## 4. Ardayda ka Hooseysa Heerkii laga rabay;

Ardayda ka hoos marta shaqadii looga baahnaa waxay u baahan yihiin caawin dheeraad ah si ay u soo gaadhaan arday ka hadheen ee fasalkooda. Waana in la siiyo cashiro iyo sharax dheeri ah, waa in fiiro-dheer loo yeesho intay fasalka joogaan, waa in la siiyo xilliyada fasaxa ah, biriftida iyo galinada dambe aqoon dheeri ah, loona sheego waalidiinta dhashay si ay u ogaadaan heerka waxbarashada caruurtooda, si ay iyaguna gacanb u siiyaan.

# Cutubka 2aad: Qaabdhismeedka Dhulka=> 12, xisadood;

## Maxsuulka Cutubka: Ardaydu waxay awoodi doonaan:

- Inay tilmaamaan lakabyada dhulka iyo sameysyada qoloftiisa.
- Inay fahmaan in saxamada dhulka ay dhaqaaqi karaan iyo inay dhalin karaan dhul-garii.=> Inay aqoonsadaan sameyska noocyada iyo isticmaalada dhaqaalaha dhadhaabaha. => Inay sharaxaan iyo inay isticmaalaan xariiqyada loolalka, dhigaha iyo inay fahmaan meridiyamka.=> Inay sameeyaan khariidad gacmeed.

| Kartida | Tusmooyinka | Waxqabadka Lafilayo |
|---|---|---|
| ▪ Ardaydu waxay awoodi doonaan.<br>▪ Inay qeexaan ereyga khariidad.<br>▪ Inay caddeeyaan isticmaalka khariidad.<br>▪ Inay sawiraan khariidad gacmeedka Afrika si ay u tusaan dacalaada xog waranka khariidada.<br>▪ Inay tilmaamaan lakabyada dhulka | 2. Qaabdhismeedka dhulka.<br>2.1. Adeegsfiga iyo xog ka helidda khariidada.Waa=> 6, xisadood.<br>▪ Adeegsiga khariidad.<br>▪ Xogta khariidada (cinwaan, jiho, taariikh, fure)<br>2.2. Lakabka dhulka Waa=> 4, xisadood. | ▪ Kadood isticmaalka suurogalka ah ee khariidada iyo cidda isticmaasha ama sameysa.<br>▪ Cashirka ku soo qaado dadka ka shaqeeya magaalada Addis xafiiska dawladu khariidada uu diyaariyay, ardayda sabuuradda ugu qor, khariidada heerkeeddu yahay 1:50,000 ama qeyb yar oo xog dheeraad ah oo la’raaciyo ah.<br>▪ Weydii ardayda waxay ku arkeen qeybaha khariidada ee khariidada nafteeda ku dulyaala sida: Cinwaanka, jihada, furaha, taariikhda i.w.m kana dood sababta ay muhiimka u noqotay. Hadaba, waydii arday walba inuu sawiro khariidad gacmeed Afrika ah ooy buugagtooda ku guuriyaan, middaad ugu sawirtay sabuuradda dusheeda. Waana inay ku yaaliin waxyaabaha fudud sida; caasimadaha, xuduuda, wabiyada |

| | | |
|---|---|---|
| | | buuraha silsiladaha ah i.w.m.=> Xusuusi ardayda siday u sawiri lahaayeen furaha iyo in aad weydiiso inay khariidadooda ay u yeelaan fure:=> Weydii ardayda sababta ay muhiim u noqotay taariikhda s loo ogaado marka lasameeyay khariidada, sida Addis-Ababa oo kale oo ah caasimada si dhaqso leh u horumareysa .<br>▪ Sharax ka bixi sida dhulka uu uga sameysan yahay lakabyo, ado adeegsanaya ugxan lakarkariyay ka dood inta ay qoloftu fog tahay ka dahaaran iyo sharax ka bixi in ubucda dhulku ay aad u kulushahay. => Sharax ka bixi walxaha muhiim ah ee ay ka sameysan tahay qolafta dhulka sida; carada, biyaha iyo dhadhaabaha adigoo adeegsanaya sawiro muujinaya qeybaha gudban ee lakabyada dhulka iyo dhadhaabta.=> Sharax ka samee dhadhaabta dhalaashan ee xoogga u soo riixiisa qolofta dhulka kama imaanayso ubucda dhulka ee kulul. Iyo laablaabka mideysan ee ku bilaabmay hanaan qalaad.<br>▪ Dood ka samee shaxanada dagaaga, dhaqax shiileedka ama dhadhaab shiileeda iyo dhaadhaab dhalan roganta.<br>▪ Ardayda waxaad tustaa muunado |

| | | |
|---|---|---|
| | | (samples).=>Weydii ardayda waxyaabaha ay ku kala duwan yihiin dhadhaabuhu iyo macdantooda ay maqleen. Ka dood, macdanta sida; maarta, dahabka iyo dhagxaanta qaaliga ah sida; Dheemanka iyo kuwa ka qiime hooseeya.=> Weydii ardayda inay guuriyaan khariidada muujinaysa kaydadka macdaneed ee Ethiopia iyo inaad arinkan aad kala doodo mar walba. |

## Qiimeynta:

**1**. Baruhu waa inuu qiimeyn joogto ah ku sameeyo shaqada ardayda inta uu socdo cutubkan waana inuu ibarbar dhigo sharaxa socda, isagoo ku saleynayo kartida, si uu go'aan uga gaadho inay gaadheen heerki waxbarasho ee looga baahnaa iyo in kale

## 2. Ardayda gaadhay heerkii shaqo ee looga baahnaa:

Waxay awoodi doonaan: Inay qeexaan ereyga khariidad, ooy sharaxaan ereyada loolalka iyo dhigaha xidhiidhkjooda ay u yihiin barbaro iyo mariidamyada inay dhisaan khariidad gacmeed Afrika ah si ay u muujiyaan xariiqyada jogoraafiyeed, inay tilmaamaan qeybo kamid ah xogta khariidada ku taala hareereheeda, inay soo bandhigaan jihooyinka ay tilmaameyso khariidada, inay tilmaamaan lakabyada dhulka oo tilmaamaya macdanta qolofta dhulka sida: Qaaradaha iyo biyaha ogoadodoa, inay aqoonsadaan noocyada iyo sameyska dhadhaabyada, inay sharaxaan isticmaalada dhaqaale ee dhadhaabada.

# Cutubka 3aad: Guriga iyo Hawlihiisa (challenges) Waa=> 16, xisadood

## Maxsuulka Cutubka: Ardaydu waxay awoodi doonaan;

- Inay aqoonsadaan isbaafinta, faa'iidada iyo qodobada waxyeeleeya amasaameeya dhirta iyo xayawaanada duurjoogga ah ee Afrika. => Inay aqoonsadaan sida loo helikaro iyo dhibaatada ka jirta kharyaadka ilaha biyaha lacabbi karo laga helo.=> Inay fahmaan hababka lagu dhawro kharyaadka dabiiciga ah.

| Kartida | Tusmooyinka | Waxqabadka Lafilayo |
|---|---|---|
| ▪ Ardayda waxay awoodi doonaan :<br>▪ Inay aqoonsadaan iyo tusaan dhirta dabiiciga ah ee Afrika oo khariid ku taala.<br>▪ Inay kala soocaan duurjooga Afrika ee muhiimka ah.<br>▪ Inay kadoodaan sida xidhiid gudeedka uga dhexeeyo deegaankooda.<br>▪ Inay fahmaan dhirta iyo xayawaan ku jira gayiga.<br>▪ Inay xaqiijiyaan in xayawaanadu ay dabar kuwo suula, haddii laga baabi'iyo sabooyinkooda.<br>▪ Inay ka doodaan qodobada ay ku waxyeeleeyaan aadimigu nafleeyda duurjoogga ah.<br>▪ Inay ka fikiraan wax aan qaban karro een kaga hortagi karro | 3.Gayiga iyo halihiisa.<br>3.1.1. Dhirta dabiiciga ah iyo xayawaanada duurjooga ah. Waa=> 6, xisadood.<br>▪ Isbaahinta dhirta dabiiciga ah iyo xayawaanada duurjooga ah.<br>▪ Faa'iido dhirta dabiiciga iyo xayawaanada duurjoogga ah (sayniska, dhaqaalaha iyo inay qeyb ka yihiin adduunkeena dabiiciga ah).<br>▪ Qodobada waa weyn ee saameeya dhirta dabiiciga ah iyo xayawaanada dabiiciga ah (Adamiga sida; caddaadiska dadka, wacyi galin la'aan, farqigga) iyo dabeecadda sida; cimilada, gubidda duurka.<br>▪ Suulidda nooyo badanta noolaha.<br>3.1.2. Biyaha, carada iyo hawada. Waa=> 4, xiso.<br>▪ Faa'iadada biyaha si | ▪ Waxaad xasuusisaa ardayda wax ku saabsan noocyada iyo filiqsanida dhirta dabiiciga ah ee laga helo Afrika, adigoo adeegsanaya khariidad Afrka (sida; keymaha rooban ee dhulbadaha, dhul-cawsedka kulaalayaasha (savanna), lamadagaanka, lamadagaan xigeenka, badda cad ee dhexe, iyo dhirta ka baxda dhulka sare ee kulaalaha).<br>▪ Waxaad hadaba aad ka doodaan xayawaanada ku nool deegaamada kala duwan, adigoo sheegaya in qeybo ka mid ah; ay ku nool yihiin in kabadan hal nooc oo dhirta ah iyo inay noloshoodu ka badbaado wanaagsan tahay. Ardaydu haqoreen noocyadaa.=> |

| | | |
|---|---|---|
| isbedelka cimilada.<br>▪ Inay sharaxaan xidhiidhka u dhexeeya aadamiga iyo biyaha.<br>▪ Inay isbarbar dhigaan farqiga kala ah heli taanka iyo yaraanshaha biyaha lacabbo ee Afrika.<br>▪ Inay tilmaamaan sababaha gundhigga ah u ah khatarta ka jirta biyaha lacabo ee Afrika.<br>▪ Inay aqoonsadaan halista ka jirta khayraadka carada ee Afrika.<br>▪ Inay baadhaan sababaha dhaliya diqawga magaalada.<br>▪ Inay laxidhiidhiyaan dhawridda dhirta dabiiciga ah kharyaadyada kale ilalaintooda.<br>▪ Inay ka doodaan xakameynta daqawga biyaha iyo hawada.<br>▪ Inay muujiyaan xiisaha ay kaga qeyb galayaan ilaalinta nadafadda biyaha si looguy isticmaalo guryaha. | loogu noolaado.<br>▪ Sababaha Dhibaatooyinka biyaha la'cabb ka jira (nadaafad la'aanta, magaaleeynta, warshadeynta, kororka dhaqsaha dadka).<br>▪ Waxyeelada carada.<br>▪ Sababaha hawada magaaladu u diqawdo.<br>3.1.3. Faragalinta tallaabooyinka laqadayo si loo dhawro kharyadka dabiiciga ah Waa=6, xisadood.<br>▪ Dharidda dhirta dabiiciga waa fure.<br>▪ Sida loo xakameeyo diqawga hawada iyo biyaha.<br>▪ Isticmaalka dhawridda hababka bedel ah.<br>▪ UNEP (oo ah jimciyadda quruumaha midoobay ee barnaamijka deegaanka iyo waajibaadka dadkeena). | Kadooda waxa dhicidoona haddii labaabi'iyo sabada ay ku nool yihiin nooluhu u sheeg dabargo'a noolaha dagaankiisa labaabi'iyo . Waxaad sii waddaa doodaada ado ku saleynaya saynis ahaan iyo dhaqaale ahaan faa'iiadada ay leeyihiin xayawaanada iyo dhirta adduunka sida; cilmi baadhista daawooyinka laga sameeyo dhirta iyo xayawaankaba.<br>▪ Waxaad kadis dagdeg ah sii saa ardayda oo labo qeybood ah, ado tusaya sawiro xayawaan oon aad loo aqoonin, iyo inaad ardayda weydiiso inay sheegaan meelaha ay ka yimaadeen iyo nooca sabada ay jecelyihiin inay ku noolaadaan.<br>▪ Weydii ardayda inay ka doodaan sababta aynu ugu baahanahay biyaha. Waxaad u diyaarisaa ardayda daato ama xog muujinaysa helitaanka biyo nadiif ah iyo inaad weydiisid ardayda inay sheegaan suurogalnimadai ilaha biyaha Afrika. => Waxaad ka doodaan farqiga u dhexeeya waxa ay tahay baahidu iyo waxa ay tahay |

| | | |
|---|---|---|
| | | suurogalnimada. Sababahana halakeeno. => Haddan, weydii ardayda inay ka doodaan lamaanayaasha iyagoon ah waa halista ku ah biyaha la'cabbo (sida; nadaafad la'aanta magaaleynta, warshadeynta iyo kororka dhaqsaha badan ee dadka Afrika).<br>▪ Ardaydu waa inay bixiyaan warbixin iyo inay go'aamiyaan doodooda. => Ku eeg cashir barashada Addis-Ababa iyo tirokoobyada dadka kororkiisa. Adeegso sawir muujinaya shaqada dhismaha cusub. => Ka shaqee maskaxda; Haka doodo ardaydu dhibaatada xagga carrada iyo hawada ah. Weydii ardayda wixii helisyo ah ee ay lakulmeen. => Kadood sawirka muujinaya hawada diqeysan ee Addis-Ababa duljoogta.=> Horumari fikirka ah khariidad muujinaysa waxtarka togan ( positive) ee u dhaxeeya xidhiidhka dhawridda dhirta iyo dhawridda biyaha, carada, hawada iyo xayawaanada duurjoogga ah. => Uqoondee ardayda |

| | | |
|---|---|---|
| | | mshruuc yar oo ay kaga qeyb galayaan hawlaha lagu ilaalinayo nadaafada biyaha ee dugsiyadooda ama dagaan kooda.<br>▪ Kadhig ardayda saddex kooxood: Midi haka doodo sida dhirta loo dhawro, iyo tasaddexaadna sida loo ilaaliyo xayawaanada duurjoogga ah iyo diqawga hawada .=> Wakiilada koox kastaa waa inay fasalka keento warbixintooda.=> Baruhu waa inuu ku qoro waxyaabaha la’soo jeediyay, wixii gal daloolo ahina waa inuu baruhuu dhammeystiraan.=> Ardayda kadib waxay kasameyn karaan qoraalo ay ku guuriyaan buugagtooda.<br>▪ Weydii ardayda haddii ay jiraan cid ku xanuunsatay biyo lacabay oo wasakheysnaa. => Ardaydu heka doodo sida loo diyaariyo looguna keydiyo biyo nadiif ah guryaha.<br>▪ Qoraal ka samee hababka loo qabto sifeynta biyaha, ado isticmaalayo goob ay ku jiraan biyo ku wasakhoobay qudaar.<br>▪ Cashir barashada |

| | | |
|---|---|---|
| | | cilmibaadhista ah ku soo qaado UNEP-da (United Nations environment programme) oo sal dhigoodu yahay Nayroobi. Waxaad sharaxdaa in dadnimo ahaan uu xil-inaga saaran yahay inaan dhawro xayawaanada dalka. |

## Qiimeynta:

**1**. Baruhu waa inuu qiimeyn joogto ah ku sameeyo shaqada ardayda inta uu socdo cutubkan waana inuu ibarbar dhigo sharaxa socda, isagoo ku saleynayo kartida, si uu go'aan uga gaadho inay gaadheen heerki waxbarasho ee looga baahnaa iyo in kale

## 2. Ardayda gaadhay heerkii shaqo ee looga baahnaa

- Ardaydu waxay awoodi doonaan: Inay aqoonsadaan dhirta dabeeciga ah ee Afrika, inay kala soocaan xayawaanad duurjooga muhiimka ah ee Afrika, inay tusaan baahista dhirta dabiiciga ah ee Afrika oo ku taala khariidada. Inay fahmaan muhimada dhirta dabiiciga ah iyo xayawaanada duurjoogga Afrika, inay cilmi baadhis ku sameeyaan falgalka u dhaxeeya xayawaanada duurjoogga ah iyo dhirta dabiiciga ah , inay sheegaan qodobada uu aadamaha ku waxyeeleeyo dhirta dabiiciga ah iyo nolosha duurka, inay ka doodaan qodobka ugu muhiimsan ee waxyeelaya dhirta dabiiciga ah iyo nolosha duurka, inay ka doodaan qodobka ugu muhiimsan ee waxyeelaya dhirta dabiiciga ah , inay sharaxaan xidhiidhka u dhaxeeya biyaha iyo aadamiga, inay isbarbar dhigaan farqiga helitaanka iyo yaranshaha biyaha la'cabbo ee Afrika, inay caddeeyaan Dhibaatooyinka mustaqbalka ee khayraadka biyaha lacabbo ee Afrika ka jira, inay tilmaamaan sababaha dhaliya dhibaatooyinkaas, inay aqoonsadaan Dhibaatooyinka ka jira khayraadka carada ee Afrika, inay laxidhiidhiyaan dhawrida dhirta dabiiciga ah iyo dhawridda khayraadyada kale, inay ka doodaan sida loo xakameeyo diqawga hawada iyo biyaha, inay muujiyaan xiisaha lagu ilaalinayo biyo nadiif ah oo lagu isticmaalo guryaha ama deegaankaba.

## 3. Ardayda ka sarreysa Heerkii Looga Baahnaa

Ardayda heerka sare ka gaadhay dhanka shaqadooda waa in lagu qiimeeyo, loona aqoonsado himilada fiican ee ay ka gaadheen hawlihii waxbarashadooda. Waa in lasii dhiirigaliyo sii wadida shaqo adeyga iyo in ayna isdhiganin si ayna uga hoos marin heerka fiican ee ay gaadheen.

## 4. Ardayda ka Hooseysa Heerkii laga rabay

Ardayda ka hoos marta shaqadii looga baahnaa waxay u baahan yihiin caawin dheeraad ah si ay u soo gaadhaan arday ka hadheen ee fasalkooda. Waana in la siiyo cashiro iyo sharax dheeri ah, waa in fiiro-dheer loo yeesho intay fasalka

joogaan, waa in la siiyo xilliyada fasaxa ah, biriftida iyo galinada dambe aqoon dheeri ah, loona sheego waalidiinta dhashay si ay u ogaadaan heerka waxbarashada caruurtooda, si ay iyaguna gacanb u siiyaan.

**5**. Hannaanka qiimeynta waa inuu baruhu siiyo fiiro gaar ah iyo caawinta lagama maarmaanka xagga ardayda qabta baahida gaarka ah sida; curyaamada, naafada, laxaadka dhiman ee u baahan gacansiinta waxbarasho ee gaarka ah.

# Cutubka 4aad: Arimaha Dadweynaha. Waa=> 17, xisadood

## Maxsuulka Cutubka: Ardayda Waxay awoodi doonaan;

- Inay baadhaan sameynta uu cudurka Ej-Ay-Fi/Aydhiska-ka uu ku leeyahay dhaqaalo-bulsheedka Afrika. Inay xaqiijiyaan saameynta maamul-suuban la'aanta Afrka.
- Inay aqoonsadaan xidhiidhka jogoraafiyeed iyo hadafyada urur-goboleedyada Afrika. Inay baadhaan saameynta uu leeyahay kororka dhaqsaha ah ee dadweynaha Afrika.

| Kartida | Tusmooyinka | Waxqabadka Lafilayo |
|---|---|---|
| ▪ Ardaydu waxay awoodi doonaan;<br>▪ Inay baadhaan faafidda iyo raadka uu ku leeyahay Afrika Ej-Ay-Fi/Aydhiska.<br>▪ Inay sharaxaan waxyaabaha waaweyn ee ka dhyasha kororka dadka Afrika. => Qoraal gaaban oo warbixineed saameeynta uu ku leeyahay meesha dadku uu ku bato.<br>▪ Inay qeexaan ama ay caddeeyaan xeerka caalamiga ah ee UN-ta ee ku saabsan xuquuqda Caruurta waxa uu ka kooban yahay.<br>▪ Inay tilmaamaan gaboo fallada xuquuqda Caruurta iyo dhaca goobahooda dagaanka ah.<br>▪ Inay bartaan sida loo ilaaliyo naftooda iyadoo ku salaysan gabood fallada xuquuqda Caruurta .Inay bixiyaan | 4. Arrimaha dadweynaha.<br>4.1. Arrimaha laxidhiidha dadweynaha.<br>4.1.1. Faafidda iyo saameynta Ej-Ay-Fi/Aydhiska-ka ee Afrika. Waa=> 3, xisadood.<br>▪ Faafidda Ej-Ay-Fi/Aydhiska-ka Afrika.<br>▪ Saameynta Ej-Ay-Fi/Aydhiska-ka Afrika.<br>4.1.2. Waxyaabaha ka dhasha kororka dadka Waa=> 4, xisadood.<br>▪ Dheelitir la'aanta u dhaxeeysa kharyaadka iyo baahida.<br>▪ Shaqo la'aanta.<br>▪ Saboolnimada.<br>4.2. Arrimaha xuquuqda iyo badbaada.Waa=> 6, xisadood.<br>4.2.1. Ladagaalanka ku gabood falka xuquuqda Caruurta Waa=> 3, xisadood. | ▪ Waxaad sharaxdaa ardayda doorka ay qaadato laanta Caafimaadka adduunka (WHO) sida; kormeerka caafimaadka iyo diyaarinta tiro-koobyo sax ah. => Weydii ardayda haddii ay fahmeen sida loo isticmaali karo tiro-koobyadaas.<br>▪ U diyaari ardayda xogtii ugu dambeysay ee faafidda Ej-Ay-Fi/Aydhiska -ka ee ay diyaarisay laanta Caafimaadka adduunka (WHO) ee Afrika. Ka dood aragtidooda ku saadan faafidda iyo saameynta Ej-Ay-Fi/Aydhiska-ka, isbarbardhig tirokoobyo labo dal oo kala duwan ah.=> Layliga ka digta qoys uu ku dhacay Ej-Ay-Fi/Aydhiska-ka oo ku nool koonfur Afrika. |

| | | |
|---|---|---|
| tusaalooyin iyo inay sharaxan maamul suuban la'aanta Afrika.<br>▪ Inay qoraan warbixin gaaban oo ku saabsan maamul wanaaga iyo maamul xumada ka jirta dagaamadooda.<br>▪ Inay magacaabaan urur-goboleedyada Afrika.<br>▪ Inay aqoonsadaan xubnaha qaramadaas kamid ah.=> Inay fahmaan hadafyada iskaashi ee urur-goboleedyadaas.<br>▪ Inay ka doodaan OAU iyo sameysankii AU-da | ▪ Xeerarka dhawraya xuquuqda caruurta.<br>▪ Laga dhawro farsamooyinka waxyeeleynaya sada; in loosheego dadka waa weyn xilkooda, kalgacal, wixii halis ah, isticmaalida dareen fiican.<br>4.2.2. Tusaalooyinka maamulka suubanaan la'aanta Afrika.Waa=> 3, xisadood.<br>▪ Musuqmaasuqa.<br>▪ Natiijooyinka dagaalada sokeeye.<br>▪ Fasalka ardayda ololaha doorashada: sida; loo hagajain karo maamulka dagaamada hooda, hadey jiraan meel-laga soo doortay.<br>4.3. Barnaamijka iskaashiga Waa=> 4, xisad (urur gobaleedyada waaweyn COMESA, ECOWAS, SADC, Nile Basin Initiative, AU).<br>▪ Asaaskii OUA.<br>▪ Hadafyada muhiimka ah ee uurada. | ▪ Weydii ardayda inay sameeyaan shaxan caaro –caaro oo lagu muujinayo dadka uu ku dhacay cudurka haddii uu yahay aabo, tusaale ahaan qofka waxyeeladu uu u geystay cudurku.<br>▪ Waxaad tilmaamntaa sida uusan waddanku uga maarmi karin dhallinta yar yare e wax bartay oo lawaayo.=> Waxaad u habeysa ciyaar ay ku muujiyaan fikirkooda dhabta ah ee ku aadan natiijada uu leeyahay kororka dadka ee xawliga ku socda.<br>▪ Waa inaad ciyaarta si fiican u hogaamisaa si shiishka loo saaro isu dheelitiraanta u dhaxeeysa kharyaadka iyo baahida aadamaha, shaqo la'aanta iyo saboolnimada.<br>▪ Ka dooda tacadiyada lagu sameeyo curuurta ee ay ardaydu taqaano.=> Diyaari majaajilo ciyaar ah oo ku salaysan midka mid ah tusaalooyinka sida; Caruurta dariska oo lagaraaco oo loogeysto dhaawacyo jidhka iyo mid lafo jab ahba ama raggu ay meel ku qabiraan gabdhaha yar yar si ay u faro xumeeyaan. |

| | | |
|---|---|---|
| | | ▪ Fasalka dood u fur si ay u muujiyaan wixii shucuubtooda ah ee ku saabsan majaajilada ciyaarta.<br>▪ Nadaamka Ammaanka; Waalidku waa inay marwalba u sheegaan caruurtooda meeshay aadayaan iyo cidda ay raacayaan. => Marka hore weydii ardayda inay liis gareeyaan xuquuqda ay filayaan ilalaintooda in loo baahan yahay. => Midda xigta waxaad eegtaa waxa uu tilmaamayo xeerka UN-ta ee ku saabsan xuquuqda Caruurta (Adeegso soo dhajinta ogeysiiska).<br>▪ Weydii ardayda haddii ay wararka ka daawadaan telefishinada ama ay dhageystaan raadiyaha, si ay ugu sheegaan fasalka waxay soo maqleen ama ay soo arkeen ee la'xidhiidha maamul wanaagga xaggashada goobahooda.=> Hayimaado qof weyn dugsiga si uu uga hadlo wixii ka jira maamulka suuban ee dagaankooda.=> Ka dood maamul wadaagga iyo maamul xumada.=> Qorshee ololaha doorshadiina. |

| | | |
|---|---|---|
| | | ▪ Qor warbixin gaaban oo ku saabsan sida loo hagajain karo maamulka deegaanka ee goobihiina haddii aad tahay ku meel laga soo doortay.<br>▪ Qor magaca ururada sabuurada dusheeda iyo weydii ardayda si ay kuugu sheegaan waxay yaqaanaan. Qor arintan, kadibna, sii iyaga xog waran dheeraad ah. Doodna ka samee wadamada xubnaha ka ah.=> Ka dood sida OAU, xilligii la'aasaasay iyo siday ku noqotay AU-da.<br>▪ Weydii ardayda haddii ay filayaan inay Ethiopia ay waxtar u tahay middan inay martigaliso-AU-da iyo waxa ay faa'iido ka helayaan.=> Ka dood ujeedooyinka waa weyn ama hadafka ururka. Warbixinna ka qor arinta. |

## Qiimeynta:

**1**. Baruhu waa inuu qiimeyn joogto ah ku sameeyo shaqada ardayda inta uu socdo cutubkan waana inuu ibarbar dhigo sharaxa socda, isagoo ku saleynayo kartida, si uu go'aan uga gaadho inay gaadheen heerki waxbarasho ee looga baahnaa iyo in kale

## 2. Ardayda gaadhay heerkii shaqo ee looga baahnaa

- Waxay awoodi doonaan : Inay baadhaan saameynta uu ku leeyahay Ej-Ay-Fi/Aydhiska-ka faafiddiisa Afrika, inay sharaxaan natiijada kororka dadka Afrika ee dhaqsaha badan, inay qoraan warbixin gaaban oo ku saabsan raadka uu ku leeyahay kororka dadka goboahooda ,inay sharaxaab sababaha loo waayay maamul suuban Afrika, inay diyaariyaan warbixin gaaban oo tusaale u ah maamulada xunxun iyo kuwa fiican ee dagaanaedooda, inay aqoon sadaan gabood falada loogeystay xuquuqda aadamiga ee Caruurta ee UN-ay taageersan tahay, inay dhaleeceeyaan gabood falada loogeysto xuquuqda caruurta ee deegaamada, inay sharaxaan sida loo dhawro xuquuqda naftooda ee ku saabsan gabood falka caruurta, inay qeexaan waxa uu yahay ereyga; ciyaal-suuqnimo, inay magacaabaan ururgoboleedyada Afrika, inay aqoonsadaan xubnaha ka midka ah qaramada urur-goboleedka Afrika, inay gartaan hadafka urur-goboleedka Afrika, inay ka doodaan wixii xogwaran ah ee ku saabsan OAU-da iyo sidii ay ugu xuubsiibatay ama isugu bedeshay AU-da .

## ▪ Ardayda ka sarreysa Heerkii Looga Baahnaa

Ardayda heerka sare ka gaadhay dhanka shaqadooda waa in lagu qiimeeyo, loona aqoonsado himilada fiican ee ay ka gaadheen hawlihii waxbarashadooda. Waa in lasii dhiirigaliyo sii wadida shaqo adeyga iyo in ayna isdhiganin si ayna uga hoos marin heerka fiican ee ay gaadheen.

## 4. Ardayda ka Hooseysa Heerkii laga rabay

Ardayda ka hoos marta shaqadii looga baahnaa waxay u baahan yihiin caawin dheeraad ah si ay u soo gaadhaan arday ka hadheen ee fasalkooda. Waana in la siiyo cashiro iyo sharax dheeri ah, waa in fiiro-dheer loo yeesho intay fasalka joogaan, waa in la siiyo xilliyada fasaxa ah, biriftida iyo galinada dambe aqoon dheeri ah, loona sheego waalidiinta dhashay si ay u ogaadaan heerka waxbarashada caruurtooda, si ay iyaguna gacanb u siiyaan.